NOQO SHAQAALO DIINEED



Luqmaan Xamraawi

SHUQUL LAGA QABTO ARLADA GUUD KEEDA WAXA U SHARAF BADAN SHAQAALO DIINEED

بسم الله الرحمن الرحيم

NOQO SHAQAALO DIINEED

Shuqul Laga Qabto Arlada Guud Keeda Waxa U Sharaf Badan Shaqaalo Diineed

Luqmaan Xamraawi

Email: Luqmaanam@gmail.com

Soo Saarista Koowaad
Safar 1439

Tusmo

Tusmo .....**Error! Bookmark not defined.**

Mahad-celin 5

AFeef.....7

Hordhac.....8

Sooyaalka Dacwada.....12

Waayihii Gumaystaha Gaaleed.....13

Xurriyadii kadib iyo Xilligii Dowladihii here.....16

Baraarugii Islaamka 18

Duullaanka Maskaxda.....21

Shabaqa Caarada 23

Daawashada Aflaamta.....24

Idaacadaha.....28

Doorka Daaciga 30

Qaacidooyinka Dacwada Dar Allaah.....32

Noqo Daaci Guuleysta 35

Guulihii Dacwada iyo Ducaadda 39

2. Xijaabashada Dumarka 41

Sababahii suura galiyay Guulaha ay Ducaadda soo Hooyeen 45

Gaabiska Daaciga.....47

Cadawga Dacwada.....52

Faafinta Dacwada.....54

In la hormariyo Wadooyinka Dacwo faafinta.....55

Habka iyo Qaababka kala duwan ee Dacwo Fidinta 57

Habka iyo Qaababka Dacwada looga Fidin karo Masjidka.....58

Habka iyo Qaababka Dacwada looga Fidin karo Goobaha waxbarashada.....63

Habka iyo Qaababka Dacwada loo gaarsiin karo Dhalinyarada.....66

Habka iyo Qaababka Dacwada loo gaarsiin karo Dumarka 70

Qaabka Dacwada Looga Fidin karo Guriga Dhexdiisa 72

Habka iyo Qaabka Dacwada loo Gaarsiin karo Shaqsiga.....77

Habka iyo Qaababka Dacwada looga Fidin karo Internetka 80

Habka iyo Qaababka Dacwada looga Fidin karo dalalka gaalada.....83

Habka iyo Qaabab kale oo si guud ahaan ah Dacwada loo fidin karo.....85

Gunaanad 90

Maxaa Maanta Nala Gudboon.....91

Tixraax 93

Mahad-celin

Waxay mahad u sugnaatay Allaah, asagaan ku mahdinaynaa, asagaan kaalmo weydiisanaynaa, asagaana dhaafis warsaneynaa, waxaan kaa magan galaynaa sharka nafteena iyo teeda xun camaladeena, cid aad hanuunisay ma jirto wax dhumin kara, cidii aad dhumisayna ma jirto wax hanuunin kara.

Waxaan qirayaa Alla xaq lagu caabudo inuusan jirin Allah weyne mooyee, Waxaan qirayaa inuu Muxamad yahay adoonkiisa iyo rasuulkiisa Naxariis iyo nabadgalyo ha'ahaato korkiisa kaasi oo nooga tagay risaalo dhameystiran

Intaas kadib waxaan si gaar ah ugu mahadcelinayaa waliba amaan, bogaadin iyo ducaba iga mudan waalidkeey Hooyo, Abooto, iyo Aabbe oo si wada jir ah u diyaariyay nolosheyda xag koriinsho, xag kaalin waxbarsho, iyo xag nolol mustaqbaleed intaba waxaan Rabbi ugu baryayaa inuu u naxariisto una danbi dhaafo, camal kasta oo wanaag ah oo sameeyana ugu kabo miisaankooda,
Allahayow waxaan ku waydiisanayaa waalidkeey abaalkooda ma gudi karee aduunka ku nooley nolol wanaagsan, aakhina gali jannada teeda sareysa.

Waxaan sidoo kale iloobi karin oo mahad mudan walaalahey, sowjadeyda iyo asxaabta aan aadka u jeclahay ee igu saaciday fikrad ,talo iyo tusma intii ku gudo jiray hosha buugan yar. Dhamaantiin waa mahad santihiin Allaha kheyr idiinku abaal mariyo.

Qof kastoo aqriya buugan eray ka mid ah, ama qof uga faa'ideeya waa mahadsanyahay marka hore, Allahana u danbi dhaafo isaga iyo waalidkiis,

Marka xigtana Waxaan si gaar ah kaaga codsanayaa aqristow in aad noo waydiiso Allaah aniga, waalidkeey, ehelkeyga iyo dhamaan muslimiinta naxariis, danbi dhaaf iyo in Rabbi nagu sugo diintiisa xaqa ah.

Afeef

Waxaan ka afeefanayaa aqristow eray kasta oo buugan ku qoran loolama dan laha qof gaar ah ama koox guud midna, waxa kaliya oo ujeedadaydu tahay talo siin iyo tusmo dacwadeed oo ku socoto cid kasta oo shaqaalo diineed ah.

Haduu qoraalka gafaf kaaga muuqdo igama aha kas iyo u la kac aan qasad u sameeyay laakiin bini'aadam dhamaantiis waa qabyo oo khalad lagama waayo.

Waxaan toosiyo oo wanaag ah waxay ka ahaadeen xag Allaah waana waafajintiisa, wixii aan khaldana waxay ka ahaadeen naf iyo sheydaan, Allaah waxaan waydiisanayaa inuu i waafajiyo wanaaga , iina dhaafo turunturrooyinka muuqda iyo kuwa qarsoon.

Hordhac

Waxay mahad u sugnaatay Rabbiga taagay cirarka tiir la'aan, dhulkana fidiyay oo ku teeday buuro, ka jeexay korkiisa bado iyo wabiyo burqado. Naxariis iyo nabad galyo Allaha yeelo nabigeenna korkiisa, ehelka iyo asxaabtiisa iyo intii wanaaga ku raacday tan iyo maalinta danbe.
Intaas ka gadaal:

Dacwada faafinteeda waa amaano weyn, uma is taagi karo mana xamilaayo masuuliyadaas qof Allaah waafajiyay mooyee. ilaa uu ka noqdo kan ugu wanaagsan hadal iyo howl qabad xaga Rabbi.

ومن احسن قولا ممن دعا لي الله وعمل صلحا وقال انني من المسلمين

(Yaa ka hadal wanaagsan mid ugu yeeray dadka xag Allaah sameeyay camal wanaagsan oo dhahayna waxaan ka mid ahay muslimiinta)

فصلت: اية 33

Rasuulka (SCW) waxa uu yiri:

من ذل على خير فله مثل اجر فاعله

(Qofkii tusiya kheyr wuxuu leeyahay mid la mid ah ajarka midka ku camal fala)

رواه مسلم

Sidaas darteed waxaan aad ugu rajo weynahay inuu u istaago gudashada amaanadaan cid kasta oo karta iney xambaarto masuuliyadda kaga aadan fidinta dacwada, lehna cilmi ku filan lagana helo camal fal san.

Fidinta dacwada kuma koobna kaliya shaqsiyaad gaar ah, dhamaan waxaan nahay ducaad, wuxuuna yiri Suubanaha (SCW)

بلغوا عني ولوا اية

(Iga gaarsiiya Aayadba ha ahaatee)

Wuxuu kaloo yiri:

كلكم راع وكلكم مسؤول عن رعيته

(Dhamaantiin waxaa tihiin qowsaar, dhamaantiinna waxaad masuul ka tihiin waxa leydiin raaciyay)

Fidinta dacwada dar Allaah kuma koobna goor iyo goob kaliya, mana aha mid waqti iyo waayo gaar ah ku eg, hasayeeshee waa mid mar kasta iyo meel walba suuro gal ah in lagu faafiyo hadba sida ugu sahlan ee umadda ay ku gaari kartana loogu howl galo.

Allaah subxaanahu watacaalaa markii uu noo tilmaamaayay waxaa uu ku laray faafinta dacwada xigmad iyo wacdi wanaagsan oo wuxuu yiri:
دْعُ إِلَى سَبِيلِ رَبِّكَ بِالْحِكْمَةِ وَالْمَوْعِظَةِ الْحَسَنَة
(ugu yeer dadka dariiqa Rabbigaa xikmad iyo wacdi wanaagsan)

Waxaan joognaa caalam shubhaadka uu aad u batay hadaan xigmad iyo wacdi wanaagsan aadan isticmaalin waxaa soo baxayso in adigii khayrka

waday aad dacwadii lid ku noqoto. Sidaas darted mar kastaba waxaa lagama maarmaan ah ayadoo dariiqii nabiga scw la raacaayo in aad loo dadaalo ayadoo laga taxadaraayo turunturooyinka sababi kara sumcad xumeynta dacwada. Waxaana loo baahanyahay in daaciga inta uusan ka howlgelin ka shaqaynta dacwada in uu soo maro tababar la xiriira habka gudbinta dacwada, maadaama dacwada tahay shayga ugu muhimsan ee laga shaqeeyo, sida aan wada ognahay shaqadii nabiyada waxay ahayd gaarsiinta dadka dacwada Allaah.

Waxa muuqata in ducaada ay si weyn ugu baahanyihiin inay bartaan cilmiga iibinta (sales) iyo suuq gaynta (marketing) maxaa yeelay labadaa maado cilmigooda waxaa uu ka hadlaa qancinta macaamiisha sidaa oo kale ayuu daaciga uu u baahanyahay in uu qanciyo dadka oo uu fahamsiiyo wanaaga uu sheegaayo

Baahida aan u qabno maanta dacwo saafi ah oo xigmad iyo degenaan ku dheehantahay way ka badantahay wax kaste oo kale, sidaan soo sheegnay shirkadaha waxay ku bixiyaan dhaqaalo iyo waqti badan si ay shaqaalahooda u bari lahayeen si ay u qanciyaan macaamiilkooda, siidaasi si la mid ah ayaa waxaan u baahannahay maanta in daaciga dacwada islaamiga xanbaarsan uu u noqodaa mid u guta dacwadiisa si ku dheehantahay xigmad, degenaan, wacdi wanaagsan, iyo waayo aragnimo durugsan, si ay u soo baxdo natiijadii la rabay ee ahayd raali gelinta Allaah iyo in dadka ay hagaagaan.

Anigoo arrimahan ka duulaya, tani waa dhambaal aan kula talinaayo dadka diin fidinta ku howlan ee ay ugu horreyaan culumada iyo ducaadda inay u daymo lahaadaan waxa socda, iyo is badalka waayaha, isla markaasna wax badan ka badalaan wajigii hore ee dacwo faafinta kaas oo runtii u janjeeray dhinaca ad adeega iyo ka badbadinta.

Waxaan soo bandhigayaa mowduuc inta badan soomaalida aysan isku howlin ka hadalkiisa ama qoraal in laga sameeyo intaba kaasi oo ku saabsan Dacwada fidinta iyo Ducaadda faafisa kheyrka, waxaa uu buugan ifin doonaaa mudadii baraaruga islaamiga soo jiray;

- Guulihii dacwo ee la gaaray iyo guul darrooyinkii soo wajahay,
- Habka iyo qaababka kala duwan ee hadda dacwada loo faafin karo,
- Meelaha uu gaabiska dacwo ka jiro.
- Fursadaha dacwo ee mudan in laga faa'ideesto

Buugan oon magac uga dhigay (NOQO SHAQAALO DIINEED) inkastoo uu ku saabsan yahay dacwada diineed faafinteeda iyo hababka loo fidin karo, hadana wax weyn ayuu ka duwan yahay kutubta ka hadla mawduucaas sababtoo ah kuma soo hadal qaadin camalka dacwada fadliga uu leeyahay iyo ajarka laga helaayo dacwo faafinta, waxaan taasi iskaga daayay dadka ducaadda ah oo ka dharagsan taas iyo in qoraalka uu noqdo mid kooban darteed.

Waxaan Rabbi weydiisanayaa in buugaan uu ka dhigo mid kheyrka loo kaashado oo u furan qalbiga qofka Muslimka ah iyo in Allaah uu noogu kabo aniga iyo waalidiintey miizaanka camalada wanaagsan maalinta danbe ee abaal marinta.

Sooyaalka Dacwada

Dacwada diinta islaamka waxey mandaqadda geeska Afrika soo gaartay intuu noolaa nabigeenna Muxamad (scw) waqtigaasi oo ku beegneed , markii qaar ka mid ah asxaabta laba jeer oo kala danbeysay u soo hijroodeen dhulka Xabashida loo yaqiinay waqtigaasi ee bariga Afrika . kadib markey u adkeysan waayeen ciqaabtii dareed ee ay kala kulmi jireen mushrikiintii Qureesheed .

Markaasi umadda Soomaaliyeed waxayba nasiib u yeelatay in diinta islaamka qaataan bilaa seef iyo dagaal la'aan . waxaana lagu tiriyaa inay ka mid tahay Soomaalida qowmiyadaha salka u ah difaaca diinta iyo faafintadacwada islaamka .

Waxaan la hilmaami karin oo xusid mudan Axmad Gurey jihaadka iyo halgankiisii dheeraa oo la dhihi karo wuxuu baal dahaba ka galay taariikhaha dunida. Waxey qorayaasha iyo taariikhyahanada reer galbeedka ku tilmaameen Axmad Guray inuu ahaa Salaaxudiinkii Afrika, Maadaama uu burburiyay lana wareegay dhulka boqortooyadii qadiimiga aheyd ee hooyada kaniisadaha saliibiyada ee itoobiya.

Umaddeena waxaa amaan ugu filan iney waligood ahaayeen muslimiin soo jireen ah una taagan difaaca diinta islaamka , kana horjeedeen cadawga horarka ah ee macatableyda Xabashida iyo kuwa mar kasta hiilka la garab taagan ee saliibiyada reer yurub .

Si kasta oo loogu soo duulay dadka ku dhaqan geeska bari ee qaaradda Afrika ee Muslimiinta ah marna lama haayo xilli ay ka tanaasuleen diintooda , si kasta oo loo dhibo oo loo dhibaateeyo, ama dabin loogu

dhigo waxay ku dhaganaayeen ku dhaqanka diintooda , walow la dhihi karo waxa jiray mararka qaar jahli baaxad leh oo la dagay umadda kana leexiyay marinkii toosnaa ee islaamka , una duway xaga bidcada iyo baadhilka .

Waayihii Gumaystaha Gaaleed

Umaddeena oo la daalaa dhacaysa jahli baaxad leh oo meel kasta ku baahay. Aqoon yarida diineed ee bulshada la degtay waxa sababay dacwada iyo culumada diinta fidiya oo iskood gaabis ugu yimid, waxaana taas ugu wacan ma jirin maamul taageera ducaada laakiin iskood ayay isku taagayeen. Arrinkaas oo jira waxa ugu darsoomay duullaanka qorshayaasha badan ee gaalada ku soo damaaciyeen carrigeena. Gumaystihii reer yurub ee gayigeena kala googooyay , waxa ugu xanuunka badan ee ay sameeyeen kala qeybinta ka sokow , waa been abuurka Taariikhda iyo qarinta qeybo badan oo ka mid ah taxanaha sooyaalka umadda muslimka ah ee ku dhaqan geeska Afrika . taasi oo sababtay iney mugdi gasho dowladihii islaamka saameynta ay ku lahaayeen dadkii ku dhaqnaa Afrikada bari iyo maamuladii iyo imaaradihii islaamka ee ka hanaqaaday halkan.

Gumaystayaashii reer galbeedka deegaanadii ay qabsadeen waxay kula kaceen bulshooyinkii Muslimka ahaa ee ku dhaqnaa kala qeybin dhexdooda ah, kala qoqobid iyo khilaaf ka dhexabuurid, waxay la

dagaalameen cid walba oo iska caabin samaysay, waxay ku dhaqaaqeen isku dayo ay ku doorinayaan dariiqa toosan dadkana ay kaga duwayaan.

Ugu horreyn waxay gacan u fidiyeen oo garab joogsadeen, kooxihii baadhilka iyo bidcada waday una nasab sheeganayay diinta islaamka, sida shiico, suufiyo, iwm. Waxay aad dardar geliyeen dariiqooyinkii suufiyada ee hore u jiray, qaarkoodna iyaga ayaa abuuray. Xabaalaha oo lagu xirnaado loona xoolo qalo gumaystaha gaaleed way sii labanlaabeen mashruuca loogu magac daray siyaaro oo dadka looga xoolo uruursado oo meel kastana lagu baahiyay balad iyo baadiyaba.

Gumaysihii Talyaaniga ee koofurta dalka haystay muddo nus qarni ah wuxuu hiil iyo hoo la garab istaagay kooxihii suufiyada qaybo ka mid ah oo aan ka qayb qaadanin halgankii looga soo horjeeday kufaarta. Kooxda Qaadariyada oo ah dariiqada ugu bidco iyo quraafaad badan suufiyada Soomaaliya ka jira si weyn ayuu Talyaaniga u soo dhaweeyay, wuxuu ka dhigay garsoorayaal iyo qaadiyaal arrimaha qoyska, dhaxalka iyo meherka qaabilsan. Culumo badan oo Qaadariyada ka mid ah waxay ahaayeen kuwo la shaqeeyo kana ag dhaw maamulkii gaaleed. Sanadkii 1935 tii dullaankii uu Talyaaniga ku qabsaday Itoobiya wuxuu u adeegsaday Soomaali la ciidameeyay oo tiradooda lagu sheego sodon kun oo askari, wuxuu ka soo qoray deegaanadii uu gumaysanaayay. Ambabixintii ciidankaas duullanka u jeeda si ay ugala qayb qaataan wuxuu Talyaaniga u yeeray Culumo badan oo Soomaaliyeed iyagoo raacaaya dhaqanka beelaha Soomaalida oo markay duulayaan ay culumada u sameeyaan xarsi xir iyo tahliil tufid. Badi Culumadii Soomaaliyeed ee waagaasi joogay way ku gacan sayreen marka laga reebo dariiqada Qaadariyada oo si wayn u ajiibtay baaqii Talyaaniga.

Waxay u xarsi xireen ciidamada duullanka ahaa uguna duceeyeen guul iyo libin.

Markuu Talyaaniga la wareegay Itoobiya iyo badi dhulka geeska Afrika wuxuu ugu abaal guday Qaadariyada dhowr Masjid uu kaga dhisay magaalooyin ay ka mid yihiin Xamar, Baydhabo iyo Godey. Waxaa kale oo ugu abaalguday in loo aqoonsado culumada dowladda ka ag dhaw ee warkooda maqasho. Gacan saarka iyo wada shaqaynta dhex martay qaar ka mid ah culumada iyo gumeystaha waxa ka dhashay:

1. Culumada qaybtii badneen ee gacansaarka gaalada diiday in lala dagaalo waa tii la laayay si weyn loo colaadiyay dariiqada Saalixiyada oo ay ku abtirsadaan halgamayaashii hubka gaalada kala hor tagay sida Shiikh Xasan Barsane, Sayid Maxamed Cabdulle Xasan iyo culumadii kale ee la midka aheed.

2. Dadweynaha waxay u arkeen gaalo loo adeego oo askar loo noqdo wax caadi ah oo banaan, mar hadii culumadiiba ay hoos fadhiyaan calanka gaalada.

Gumaystihii kuma ekaanin kaliya ka talinta aayaha umaadda wuxuu furay goobo waxbarasho, kuleejooyin lagu dooriyo diinta ubadka lagu xareeyo halkaasi, wuxuu kaloo ka dhisay magaalooyinka waa weyn ee dalka Kaniisado, dad badan way gaaleysiiyeen, kuwo kalana waxay dooriyeen dhaqankoodii wanaagsanaa.

Waqtigii gumaystaha way sii shiiqday dawcada, oo diin barashada iyo dacwo fidinta oo markii hore gaabis ahaa hadana indhaha ayay isku qabtay.

Xorriyadii kadib iyo Xilligii Dowladihii here

Markii la helay xorriyadii la raadinaayay oo gumaystayaashii isaga huleeleen gayigeena, dowladihii hana qaaday kama gadisneen gaaladii guurtay, dastuurkii iyo xeerarkii gumaysataha ayaa dowladaha u ahaa diin lagu dhaqmo. Waxay madaxda si dadban uga horjeedeen dacwo fidinta ayadoo la fulinaya dardaarankii gumaysiga.

Culumada dowladda laga soo bilaabo gumaystihii waxa mar kasta ahaa Suufiyada gaar ahaan dariiqada Qaadiriyada, wanaag iyo wax sheeg diineed lagama dheefin, laakiin khaladaadka xukuumadaha way u qiil bixin jireen, waxay isaga qaraabanaayeen magaca diinta, marna ma ogaleen xaq sheeg iyo cid xaraf diineed taqaana oo iyaga aheen.

Qaadiriyo iyo qaybihii Suufiyada qarriban ahaa quraafaadkooda waxay u heleen qaran taageera. Danbiga shirkiga wuxuu ahaa mid dowladaha maal badan ku bixiyaan heer qabuuro ku dawaafka loo tixgaliyay siyaaro qaran oo sanad walba wasiiro iyo wafdi la socda ka qeyb qaataan.

Xukuumadihii ka dhaxlay gaalada xukunka markoodii hore waxay ahaayeen kuwa rayid ah oo aad u dabacsan walow cadaadis hoose uu haystay culumada iyo ducaada laakiin si muuqata looma bartilmaameedsan, waxase xigay kuwaas askar amar adag oo talada afganbi ku timid waxay ku bilowdeen qabqab, qaab xumo iyo wax

qaribaad, waxay duuduub u hirgaliyeen mabaadii gaalo oo marna muslim ku dhaqmi karin. Waxa la soo saaray xeer u gaar ah qoyska oo khilaafsan shareecada xag kastaba haday dhismo qoys tahay furiinka cida leh, iyo haday dhaxal tahay iyo sida loo qaybsanayo.

Badi culumada way ka baqdeen inay u bareeraan ka hor jeesiga diin doorinta kacaanka ku kacay, waxaase dhiiraday culumo aan birta ka baqin, toban ka mid ah waa la toogtay, sadax boqolna xarig adag iyo xabsiyo dhaadheer ayaa lagu xukumay waxa saas loogu galay waa diinta daraadeed.

Xilliyadii Dowladihii hore gaar ahaan tii Maxamed Siyaad xaq diineed lama sheegi karin, faafinta dacwada qarsoodi ayuu ahaa. Waxaa sare jiray xumaanta, fisqiga iyo fasahaadka. Sidaasi oo tahayna waxa jiray dadaal badan oo ducaada ku bixinaayeen baahinta dawcada, dhib iyo dhibaato walboy kala kulmaan dowladda.

Baraarugii Islaamka

Duulaanadii iyo dabinkii isdaba jooga ahaa ee reer galkbeedka ee ku wajahnaa muslimiinta wixii in muddo ahba loo babac dhigo ugun danbeyntii sanadkii **1330** hijriyada waa waqtigii magaalada Istanbuul laga masaafuriyay khaliifkii ugu danbeeyay Muslimiinta **Suldaan Cabdi Xamiid** markaasi oo si rasmi ah loo burburiyay khilaafaadii Cuthmaaniyiinta oo badi muslimiinta mataleysay, waxay dowladihii reer galbeedka qeybsadeen dhulkii ay khilaafada ka talin jirtay, waxana la giliyay dadkii muslimiinta ahaa gumeysi arxan darro ah , walow loolan iyo halgan adag lagala hortagay gumeystaha gaaleed. Kacdoon iyo kifaaxii kufaar diidka ahaa oo mudo socday waxa shucuubta Muslimiinta u suurowday inay iska dulqaadaan heeryadii gumeysiga reer galbeedka. Hasayeeshee xoriyadda kadib ragii umadda hormuudka u noqday waxay marin habaabiyeen ujeedadii halganka oo lama guran mirihii geedka gobanimo ee dhiiga badan lagu waraabiyay.

Waxa uu Abwaan Qaasim ku maansooday :

- Isma doorin gaalkaan diriyo daarta kii galaye ·
- Dambi kuma hadlayee ma arag dowladaan rabaye.
- Meeshaan dad aan uruurshiyo dirir ka eegaayay.
- Iyaba waa dar xumee dacar miyaan leefay.
- Ma doraata raadkaan dhigaan dib ugu soo laabtay.
- Sidii aan dayaayay miyaan dawgii ka habaabay.

Mar haddii lagu hungoobay halgankii xoriyad doonka waxa hanaqaaday baraarug diini ah oo lagu doonayo in dib loogu soo celiyo khilaafadii burburtay laguna mideeyo muslimiinta si hal meel looga taliyo, shareecadana noqoto dastuurka dowladda ku dhaqanto.

Bartamihii qarnigii toban iyo afaraad ee hijriga Waxa sameysmay ururo, iyo dhaqdhaqaaqyo diini ah oo si dhaqsa ahba ugu baahay bulshada Muslimka dhexdeeda, walow dusha sare ay ka jirtay Dowlad calmaani ah, hadana waxay Kooxaha islaamiyiinta kareen inay ka dusaan shabaqyadii sirdoonka si toos ahna ay bulshada ugu gudbiyaan dacwada diineed.

Cadaadis iyo culeesaad badan oo la saarayay Islaamiyiinta wax sidaas ah kama badalin, waliba dacaayadaha iyo duritaanka badan ee dowladaha iyo xulafadooda ay islaamiyiinta ka fidin jireen waxay u soo jiiday taageero iyo shacbiyad baaxad leh. Dhalinyaradii Muslimiinta ee dhiganaayay dugsiyada sare iyo jaamacadaha waxay si xoog leh ugu biireen ururadii islaamiyiinta, taasi oo wax weyn ka badashay bulshadii jahliga la degay, markii qeybo ka mid ah dhalinyaradii ay ku dhiiradeen dacwo gudbin toos ah, waxayna wacdi iyo waano iskala taageen dhamaan goobaha bulshada iskugu timaado, hadey ahaan laheed, goobaha waxbarashada, suuqyada, jidadka, xitaa xafiisyada, xarumiha dowladda iyo xerooyinkii ciidamada ayay dacwadii gaartay.

Waxa qalqal badan dareemay qolyihii xukunka haystay ee calmaaniyada loo soo wakiishay inay ka dhaqan galiyaan dalalka Muslimiinta. Si xowliga ururadan ay u fidayaan loo horjoogsado, Hogaankii

islaamiyiinta waxay dowladihii kala kulmeen xarig saf mar ah iyo xukun dil ah, taasina wax sidaas ah kama doorinin degdeg u baahidii dacwada, waxayba islaamiyiinta ka sii qaadeen ad adeeg iyo adkeysi badan.

Guuldarrada soo wajahday ragii horboodayay xukuumadihii calmaaniyada ee dalalka Muslimiinta ka jiray ma farxad galinin reer galbeedka waxayna ku qasbanaadeen inay dajiyaan qorshooyin cusub, si ay uga lib keenaan duullaanka ay xaqa kaga soo horjeedaan.

Waxa kal hore fashil ku soo dhamaaday gumeysigii tooska ahaa ee reer galbeedka ku hayeen dalalka kale ee dunida, waxay mar kale bilaabeen isku day gumeysi cusub ah kaasi oo ku dhisan duullaan maskaxeed xaga fikirka oo lagala dagaalamo dadka kale si ay ugu noqdaan reer galbeedka shaqaale u hogaansan oo meeshii la doono loo hago. Duullaankan cusub ayaa ka khatar badan kii hore kun iyo kow jeer.

- Dusha midabka Soomaali baad dugulka moodaa.
- Misna laguma diirsan qarbiga waa diirkii faranji.

W/T: Abwaan Qaasim

Duullaanka Maskaxda

Cadawtooyada soo jireenka ah ee ka dhexeysa Muslimiinta iyo Gaalada ma aha mid dhamaatay amaba ku dhaw inay hakato, laakiin maalinba maalinta ka danbeysa waxay yeelaneysaa wajiyo iyo qaab cusub oo kii hore aad uga khatar badan xag kastaba. Waxay gaalada hindisayaan qorshooyin iyo khidado hor leh oo ay rabaan inay ku dhabar wareemaan Diinta xaqa ah si ay u gaaraan rabitaankooda ku dhisan hawada naftooda iyo u heelanaanta hadafka Sheydaanka..

Waayihii hore colaadda waxay laheed xad iyo xuduud ay ku egtahay, xoogga ciidamada iyo adeegsiga awood toos ah waxay ahaayeen wadada kaliya ee bulsho dhan lagu qabsan karo haddii lagu jabiyo iska hor imaadka iyo goobta dagaalka, hasayeeshee waxa umadda u sahlaneed inay ka soo kabsadaan jabka ciidamadeeda ka soo gaara duullaanadaas maadaama ay u badbaado qabto caqiiqadeeda diineed.

Haddii hore loo adeegsan jiray dagaallo iyo duulaamo toos ah oo Islaamka lagu soo qaado, waxa maanta taasi ka khatar badan kun iyo kow jeer Duulaanka Masxada ee sida weyn ay waayahaan danbe u isticmaalaan Cadawga Muslimiinta. Dowladaha reer galbeedka iyo guud ahaan gaalada si kasta oy u kala afkaar iyo aragti duwan yihiin, haddana waxay mideysan yihiin la dagaalanka Diinta Islaamka iyo dadka Muslimka ah mar kasta iyo meel walba oo dunida kaga noolyihiin. Waxay gaalada dhaqaalaha ugu badan ku bixiyaan la dagaalanka waxa loogu yeer Argagixisada oo ay ula jeedaan Islaamka, ayaga oo adeegsanaaya hab iyo xeel kastaba oo u suuro galin karta inay ka lib keenan howshaasi ay ku harsi iyo hurdo seegeen.

Waxay reer galbeedka aad u adeegsadaan duulaanka maskaxda si ay u baabi'iyaan dadnimada iyo damiirka jiilka soo koraaya ee Muslimka ah. waxa taasina ka saaciday horumarka Tiknaloojiyada ee caalamka uu ku sii talaabsanaayo marba marka xigta, waxayna aad u adeegsadaan aaladda tiifiiga iyo netka si ay u gaarsiiyaan afkaartooda meela fogfog. Waxa taasi ka dhashay waxyeello aad u balaaran oo soo gaartay dadkeena Muslimka ah gaar ahaan da'yarta aan ku baraarugsaneen dhagarta cadawga u maleegaayo si ay uga ilduufaan hadafka iyo ujeedada loo uumay.

- Dacaayado jumlo ah iyo been lajoogteeyo.
- Tiifiigaaad ujeedo ama idaacad jabaqleysa.
- Joornaal halagu qoro ama Internet jadiidka ah.
- Jidkastey umaraan duulaankay ujeedaane.
- Mar haddii jowharadda qalbiga lagaa jikaaro.
- Waa jug culus iyo jabaan laga soo kabanin.

W/T:Luqmaan Xamraawi

Shabaqa Caarada

Inyar ka hor waxa dunida lagu tilmaami jiray inay ka koobantahay qaarado iyo dalal mid kastaba arrimihiisa siyaasadeed, bulsho, dhaqan, diin, dhaqaale iyo fakarba ay gooni u tahay in lagu faafiyo gudaha dalka ay khuseyso oo kaliya.

Hasayeeshee dunida ma'aha sidii hore; maadaama ay wax badan iska badaleen xoga tiknaloojiyada, wada xiriirka iyo isku xirnaanshaha dadka caalamka ku dhaqan, waxay maanta dunida maraysaa in lagu tilmaamo hal qol amaba tuulo kaliya marka loo fiiriyo xaga tiknaloojiyada.

Taasi faa'idada yar ee muslimiinta u leedahay waxaa barbar socda khasaaro aad u weyn, maadaama ay gacanta ugu jirto tiknaloojiyada oo ay maamulayaan amaba milkiyadeeda leeyihiin cadawga muslimiinta. Hadaba isbadaladaasi la xiriira xaga tiknaloojiyada waxa ka dhashay in duulaankii ay kal horeba wadeen reer galbeedka uu sii laba kacleeyo.

Sheyga micnihiisa ugu dhaw uu yahay Shabaqa Caarada ee bulshadana u taqaan Shabakadda Internetka waxa si weyn uga buuxa afkaar qaloocan iyo dhaqamo khaldan, waxaana ka furan goobo dhexdooda ah baro bulshada si aad ah u booqato oo malaayiin gaaraaya, looguna tala galay faafinta iyo baahinta fisqiga, munkarka iyo fuxshiga, si loo baabi'iyo dhaqanka suuban ee diinta islaamka.

Waxaa marba marka ka danbeysa sii badanaaya da'yarta muslimiinta ah isticmaalka iyo ku xirnaanshaha xaga internetka waxayna taasi keentay:

1. Inay isu arkaan dhalinyarta muslimiinta ilbax iyo dad horumar badan sameeyay oo ay ka fogaadaan waxay dib u dhaca u yaqaanaan ee ah joogista masaajida iyo xaadirida xalqooyinka cilmiga ka socda.

2. Inay saameyn badan ku yeelatay dhalinyarada muslimiinta ah afkaarta iyo dhaqamada xun ee ay ka xambaareen xaga internet ka, iyadoo lagu maldahay qaab ciyaareed iyo aflaam maaweelo loo moodo, taasi oo waxa muuqaalkeeda kore loo maleeyo ay ka badalan tahay ujeedada iyo hadafka ay ka leeyihiin cadawga islaamka.

3. In waqtigooda qaaliga ahaa uu ku dayacmo hor fadhiga shaashadaha cumbiyuutarka iyo fiirinta mobeelada netka laga isticmaalo, umana aabo yeelaan waqti salaad iyo waxbarasha toona, waxay saacado badan ku bixiyaan waxa baraha bulshada loogu yeero, si ay dhexdooda u sameeyaan haasaawo macno la'aan ah.

Daawashada Aflaamta

Waxaa aad ugu sii baahaya gudaha dalka goobaha lagu gado aaladaha la xiriira fiirsiga aflaamta iyo taleefishinada caalamiga ah, marba marka danbeysa waxaa isa soo taraaya shirkadaha kireeya ateenooyinka fududeeya daawashada tooska ah ee tiifiyada kala duwan ee aduunka.

Ilaa boqol iyo dhowrka janal ee shirkad walba ay ku jaangoysay in laga daawado ateenadeeda, waxay boqolkiiba todobaatan yihiin kuwa dhaawacaya dhowrsanaanta umadda iyo dhaqanka suuban ee islaamka.

Marka laga soo tago gudaha magaalooyinka waa weyn ee dalka, waxaadba moodaa in aaladda diishka ay u gudubtay tuulooyinka iyo baadiyaha fogfog, waxayna ka mid noqotay agabka lagama maarmaanka u ah amaba uu muhiimada badan siiyo qoyska soomaaliga ah.

In kastoo tiknaloojiyada tahay aalad laba afla ah oo khayr iyo shar hadba cida isticmaasha iyo dhanka loo adeegsado tahay, hadana waxa aad u badan wax yeelada maadaama ay u badan tahay bulshada dhalinyaro, caadiyana nafta aadanaha loo qurxiyay xaga dhaldhalaalka iyo shahwada ay naft jeceshahay, waxa taasi ka dhashay:

1. Wiilasha waxay xoogooda isu geeyaan daawashada ciyaaraha kala duwan gaar ahaan kubadda cagta waxayna sababtay;

- Inay kala taageeraan kooxaha kubadda cagta ciyaara, marna inay daawadaan marna ay ka doodaan qaab ciyaareed kooda, taasi oo mararka qaar sababta gacan ka hadal iyo dagaal ay naf ku go'do, sida marar badan ka dhacday caasimadda Muqdisho iyo meelo kale oo ka mid ah gudaha dalka.

- Inay jecelyihiin oo niyadooda mar kastaba la jirto mid kood amaba dhowr ciyaartooy oo lagaba yaabo inay gaalo yihiin, waxa inta badan uu jaceel kaasi sababaa inay ku daydaan hab dhaqanka iyo hanaan labiskooda, sida inay sii dayaan amaba dheereeyaan isbaalka , ama inay si qaab daran u jartaan timaha , waana muuqaalka u badan dhalinyarada maanta ee dunida muslimka.

- Inay waqtigooda ku dayaceen daawashada, ka doodid , iyo ciyaaridda kubadda cagta, haba sheegin camal kale ee haddey isku soo beegmaan lama dhowro xilliyada salaadaha, waxayba muhiimada siiyaan dheesha iyo daawashada cayaaraha.

2. Gabdhaha waxay xiiseeyaan daawashada si joogto ah filimada loo yaqaan musalsalaadka, oo ku saabsan arrimo la xiriira qoyska oo la jaan qaadaya ilbaxnimada cusub waxa loo yaqaan ee maanta caalamka maraayo.

- Aflaamta musalsalka waxa loo habeeyay hab xeel sare ah oo soo jiidaneysa da'yarta dunida ku dhaqan. waxaa lagu maldahay madadaalo iyo maaweelo badan hasayeeshee waa fikir meel fog taabanaaya, waa duullaan maskaxeed balaaran oo xambaarsan mabaadii iyo caqiido qaloocan oo ka soo hor jeeda tan islaamka. waxaa iyana taasi barbar socda filimada Hindiga oo ka sii daran xaga fasahaadka kuwa musalsalaadka caadiga ah. Filimada af soomaaliga lagu tarjumo waxaa u badnaa baryihii hore aflaamta Hindiga ah, laakiin hadda waxa soo siyaaday in la tarjumo dhamaan filin kasta oo mar kaasi ka shaac baxa dunida, haba ahaado mid dhaqamo aad u xun xambaarsan.

- Marba marka ka danbeysa taleefishinada af soomaaliga ku hadla ee ku soo kordhaya hawada, waxay si joogto ah u soo daayaan barnaamishyo badidooda aan nuxur diineed laheen. Kanaalada qaar waxay xooga saaraan turjumaada iyo soo deysmo joogto ah

aflaamta shisheeye ee af soomaaliga loo rogay, si cid kasta oo daneyneysa aysan u seegin waxa la soo daayaa laba jeer maalin kastaba. taasi saameyn xoogan ayay ku yeelatay da'yarta soo koreysa haba ugu sii badnaadeen gabdhaha oo aad u xiiseeya aflaamta musalsalaadka waxyna sababtay:

- In gabdhaha ay ku bixiyaan waqtigooda badidiisa daawashada shaashadaha tiifiyada si u daboolaan rabitaankooda badan ee u qabaan aflaamta, lama dhowro waqti salaad, waalidna lama qaato amarkiisa inta uu hawada ku jiro filinka.

- Waxay gabdhaha ku reebeen filimadaasi raad qoto dheer, jilayaasha filimada ayay la qabitimeen dhaqanka iyo hanaan labiskooda , si aad ah ayay u tixraacaan dhaqankooda isjajabinta iyo qaab hadalkooda, hab dhaqanka iyo hanaan labiskooda, tu kastaba markey muddo daawato waxay illowdaa dhaqanka iyo dabcigeeda, si fudud ayay u qaadataa wax ka mid ah dhaqamadii badnaa ee filinka kala kulantay.

Idaacadaha

Tobankii sano ee u danbeyay waxa gudaha dalka iyo Goobaha dibadda ee dadka Soomaaliyeed ay u barakaceen ku sii badanaayay baro idaacadeed oo (FM) ah oo afka Soomaaliga ku hadlo, meel kasta oo dad Soomaaliyeed ay ku dhaqan yihiin waxa ka howl gala dhowr idaacadood, kuwaasi oo hawada ku jira saacado badan, Idaacadahaan tirada badan walow loo furtay dano kala duwan oo isugu jira ganacsi iyo mid siyaasadeed, haddana badankooda waxay ka mideesan yihiin baahinta barnaamijyo lid ku ah Caqiidada saxiixa ah iyo dhaqanka suuban ee diinta islaamka. Waxaad moodaa soo minguurinta fisqiga mutaxan ee lagu sheego fanka cusub iyo baahinta heesaha iyo muusikada aan waqtiyeysneen inay ka mid tahay waxa loogu yeero saxaafadda xorta ah.

Idaacadahan waxay bulshada muslimka ah ku soo kordhiyeen xumaan aan tiro iyo xad laheen, waxaana laga xusi karaa:

- Baahinta iyo buubuuninta ictiqaadka ay aaminsan yihiin, dhaqamada iyo caadaadka gaaleed ee aan cilaaqo la laheen xogta iyo wararka caadiyan ay saxaafadda baahiso.

- Xilliyada ay masiibooyinka dhacaan sida abaaraha, daadadka, dagaalada iwm dadka ku barakacay marka ay wareysanayaan waxay ku soo xiraan hadalkooda maxaad weydiisaneysaa beesha caalamka iyo hay'adaha gargaarka bixiya, halkaasi oo bulshada ay ku baraan baryada gaalada, taasi oo caado ka noqotay baryahaan danbe goobo badan oo dalka ka mid ah.

- Baahinta ciyaaraha reer galbeedka oo bulshada looga dhigay lagama maarmaan iyo nolol maalmeedka nafta daruuriga u ah, heer la gaar siiyay in loo furo idaacado gaar u ah ciyaaraha kaliya baahintooda iyo buunbuunintooda un u go'an. Guud ahaan idaacadaha barnaamijyadooda ciyaaraha waxay ku soo beegaan xilliyada salaadaha siiba waqtiga salaadda Duhurka, inta badan dhalin yartii waqtigaasi waxay wada hogan yihiin harka geedaha hoostooda halkaasi oo ay dhegta kuwada haayaan dhegeysiga barnaamijka cayaaraha ee idaacadaha ay baahinayaan, taasi oo sababtay in dhalinyarada ay dayacaan dukashadii salaadaha.

- Been abuurka wararka iyo Isku dirka iyo kala fogeynta guud ahaan bulshada , gaar ahaan beelaha si looga dhex dhaliyo colaado iyo cadawtooyo daba dheeraada oon dhamaad laheen, waxaaba moodaa in mashruuca ugu badan ee idaacadaha uu yahay qodabkan maadaama wararkooda badan aysan ku saleesneen xaqiiq iyo xog dhab ah.

Doorka Daaciga

- Dacwo diineed baa dadaal mudan iyo daadihin howle.
- Dunidoo dhan iyo dariiq kastaa lagu daah furaaye.
- Dadkaas wada dayacan hadii xaqa loo soo dumeynin.
- Shaydaan baa duufsanaaya iyo duulal baase.
- Daaciyow badi dadaalka oo gudo doorkaaga

W/T: Luqmaan Xamraawi

Daacinimada waa Shaqaaalo Diineed, waana tan u kheyr badan shuqul iyo camal laga qabto arlada guudkeeda. Maadaama Nabi danbe oo soo baxaya uusan jirin, Ducaada waxay hayaan shaqadii Anbiyada lagu yaqiinay oo aheed in laga shaqeeyo Diinta faafinteeda, loona huro naf iyo maal, si ay u meel marto. Howshaas adag waxay u baahantahay halgan dheer oon hurdo iyo harsi laheen, si looga lib keeno loolanka adag ee lagula jiro baadhilka waxa la gudboon daaciga:

1. Daaciga waa inuu door weyn ka ciyaaraa hormarinta iyo habeynta nolosha Aadanaha, waana inuu isku howlaa mar kastaba sixida iyo toosinta qalooca iyo khaladaadka ka dhaca qof iyo bulshaba.

2.Waxa Daaciga la gudboon inuu la saaxibo dhalin yarta si uu u helo xaaladahooda nololeed, uguna sahlanaato inuu si fudud u fahamsiin karo hadba mawduuca uu ka hadlayo.

3. Howsha looga fadhiyo qabasheeda Daaciga ma aha kaliya fidinta dacwada ee waa inuu ka qeyb qaataa majaal kasta oo dhinaca kheyrka ah

hadduu karo sida musaalaxada iyo heshiis la dhex dhigo kolka uu khilaaf soo kala dhex galo laba is qabta, qoysaska deriska ah, iyo guud ahaan qabaa'ilka iyo qeybaha bulshada ka kooban tahay.

4. Daaciga waxaa la gudboon mar kastaba ka war qabka xogaha muhiimka ah ee la xiriira marxaladaha kala duwan ee umadda ay dhex maquuraneyso si duruusta iyo wacdigiisa ay u noqdaan mid wadciga ku saleesan, oo hadba mowduuca ku haboon u soo qaato.

5. Waxa daaciga la gudboon hubinta iyo xaqiijinta saxnimada iyo sugnaanta axaadiithta uu daliishanayo iyo casharada dacwo ee uu dad gaarsiinaayo, si khalad iyo qalooc hor lah ugu dhex faafin bulshada dhexdeeda. Arrintaasina waxay ku imaan kartaa inuu daaciga aqoon u lahaado hadba Waxa uu gudbinaayo.

Qaacidooyinka Dacwada Dar Allaah

Qof kasta oo Daaci ah waxa looga baahan yahay inuu niyada ku haayo mar walba iyo meel kasta oo uu joogaba qaacidooyin muhiim ah oo lagama maarmaan u ah ka miro dhalinta mashruuca dacwo ee uu mar kastaba daaciga ku howlan yahay.

1. Allaah dartiis oo dadka diinta loogu yeero waa dariiqa guusha iyo badbaadada labada daar aduun iyo aakhiro.

2. Inuu sababkaaga uu ku soo hanuuniyo Rabbi hal qof waxay kaaga khayr badan tahay geela gadgaduudan.

3. Dacwada faafinteeda ayaad ku heleysaa ajarka ee kuma xirno midna inay dadka kaa qaataan iyo iney ku khilaafaan .

4. Waxa Daaciga saaran inuu cilmi durugsan u lahaado waxa uu dadka u sheegaayo, iyo inuu isku dayo inuu u gaarsiiyo dadka si cad oo ay fahmi karaan.

5. Waxa Daaciga saaran inuu ku bixiyo dadaal dheeraad ah si qaab aad u sahlan uu dadka xaqa ugu cadaado, arrinkaasina Allaah sw uu u talo saarto.

6. Daaciga waa miraayadda ay ka muuqaneyso Dacwadiisa waana tusaalaha nool ee looga dayanayo waxa uu sheegaayo.

7. Dadka ula hadal hadba heerka uu gaarsiisan yahay garaadka iyo garashadooda aqooneed.

8. In leys imtixaano waa sunnada Allaah u jideeyay addoomadiisa, waana wadada tusmada Dacwada iyo toosinta nafsadda Daaciga.

9. Dacwada waa meelo iyo majaal badan tahay, ee Daaciga waa inuu Dacwadiisa uga dooro hal meel iyo hal mowduuc oo gaar ah oo uu is leeyahay way ku haboon tahay markaas iyo meesha la joogo.

10. Xilliga waa qeyb muhiim ah oo ka mid ah Dacwada ee si weyn ugu deymo lahaaw waqtiga oo dooro mar walba mawduuca markaas ku haboon .

11. Dacwada waxa muhiim u ah si looga miro dhaliyo, qorsho degsan oo oo aad loo qaabeeyay oo loo fuliyo si taxane ah iyo raadraac joogto ah oo dib loogu milicsado tallaabooyinka hore loo qaaday si loo saxo haddey jiraan khaladaad iyo gafaf dhacay inta howsha socotay.

12. Dacwada waa muuqaal weyn oo ka mid ah muuqaalada guud ee Jihaadka, waxayna wadaagaan dagaalka laba arrimood oo ah ujeedada iyo natiijada.

13. In aqoon buuxda loo lahaado cidda la gaar siinaayo Dacwada waa shey aasaasi ah oo Daaciga ka saacidi karta inuu hadba si ugu dhigo hadalka qofkaas ama bulshadaas ay ku socoto dacwada.

14. In la derso oo wax badan laga barto bey'ada iyo qaab nololeedka deegaanka markaas Dacwada laga wado waxay ka mid tahay sababaha ay Dacwada ku guuleysan karto.

15. Dacwada waa badeecadii Shareecada, mana haboono Daaciga inuu dadka ugu bandhigo si ku xiran aduunka, hasayeeshee waa inuu u tilmaamo kaliya ajarka iyo abaalmarinta daarta aakhiro.

Noqo Daaci Guuleysta

- Hadaad caalim shiikh tahay ama shaqaalo diineed.
- Oo kheyrkiyo wanaaga sheegtoo sharkana reebeyso.
- Sarriig Xishoodkiyo shiixa waa shey muhiim ahe.
- Shiikhow hashabaqsinin sidii shaab dhalinyaraade.
- Shuruudaha adi lagaa rabo waaba wada shaace.
- Waxyaabahaa lagaa sharay ma'aha shartaa kaliya.
- Sheeyaal badanaa jiroo shaqsiga u banaan.
- Adigana mar hadaad sharribto lagu shareystaaye
- Shaah cabid iyo sharaabkiyo wixii shabahaaba.
- Lalama tago jidka shaariciyo meel lagaa shuufo.
- Ha ahaato walaal shaqiiqiyo zowjadaa sharfane.
- Dumarka waa lagala shiixaa salaan shaaricaye.
- Xijaab iyo wixii shuka xiran gacanta shab hasiinin.
- Shicaarada kaftanka sheekeed iyo shactirada badan.
- Ciyaaraha shacbiyeed iyo wixii lagu shaac baxaaba.
- Kuma roono shiikh wadaada iyo shaqaalo diineed.
- Shiikhow sheeyada qaar inkastoo sharciga baneeyay.
- Hadana mashurakeyo ruux sharaf leh waa ka shiixaaye.
- Guul la sheegiyo libin shaamila hadaad shinsanayso.
- Intaad adiga dharag shabacdaa lama dhigto shafkee.
- Howl Shaqo shuqul iyo dadaalbaa lagu shuqloobaaye.

W/T: Luqmaan Xamraawi

Banii aadamka howl kasta uu qabanaayo wuxuu jecel yahay inuu ka lib gaaro oo guul ka soo hooyo, Wax kasta Allah wuxuu u yeelay sababo suura galin kara howshaas ka sokow qadarka iyo waafajinta Rabbi, haddii qofka laga helo sababa uu ku guuleysan karo Rabbina uu u qadaro guusha waa xaqiiq inuu guuleysanaayo caqabad walba ha jirto cadaw kastaba ha lahaadee.

Dacwada ma aha howl sahlan oo cid kastaba ay si fudud uga lib keeni karto, waa howl baaxadeeda leh, waa shaqo tan ugu culus ee shaqsi u kaco qabashadeeda, waa wado caqabado badan iyo cadawyo joogta ah ay ku hor gudban yihiin, Arrihamaan hoose waxay Daaciga u sahlayaan inuu si fudud ku gaaro yoolka uu hiigasnaaya ee ah gaarsiinta dadka dacwada xaqa ah.

1. Dar Alle iyo inaad ka ajar xisaabsato dadaalka Dacwada, waxay kuu sahleysaa inaad u dhabar adeegto dhibka badan ee kaga imaanaya dadka aad Dacwada gaarsiinayso.

2. Daaciga guuleysta uma tacasubo umana janjeero koox, jamaaco, urur , qolo, iyo sheekh toona waxa kaliya uu ku xiran yahay waa kitaabka iyo Sunada Nabiga (scw)

3. Daaciga guuleysta waa kan ku miisaama arrimaha masaalixda iyo mafsadada ka dhalan karta.

4. Daaciga guulkeysta waa kan u kala hormariya howlaha dacwada midba tay ka muhiimsan tahay.

5. Daaciga guuleysta waa midka aan kala jarin camalka ee mar iyo meel kastaba uu joogo howsha dacwada joogteeyo, camal yar oo la daa'imo ayaa ka wanaagsan howl badan oo la dayaco.

6. Daaciga guuleysta waa mid dulqaad badan aad u degan, kana fog fudeydka oo aan degdegin xilli iyo xaalad kastaba.

7. Daaciga guuleysta waxa dadka u yahay ku dayasho wanaagsan, oo dadka tusaale ugu noqdo; aadaabta, dabciga, asluubta, dadaalka, dulqaadka, deeqsinimada, naf hurida, geesinimada, sabarka, cafiska iwm.

- Haku doorinin xumaanta tu la mid ah, ee ku bedal saamaxaad iyo cafis.
- wanaaji dadka oo u dhimri si mar kastaba ay dhinacaada u taagnaadaan.

8. Daaciga guuleysta wuxuu saad ka dhigtaa cilmiga diineed sida; caqiidada, tafsiirka, xadiithka, fiqiga, iyo inuu si weyn u derso Siiradii Nabiga (scw) siduu dacwada dadka ugu yeeri jiray.

9. Daaciga guuleysta waxa uu ku dadaalaa camalka suuban, iyo inuu badsado cibaadada Allaah, sida
    - Akhrinta Quraanka kariimka,
    - Dukashada salatu leylka
    - iyo sadaqada oo la badsado.

10. Daaciga guuleysta waa kan ka fogaado wax yaabo badan oon caadiyan banaan laakiin ceeb ku ah oo aan ku habooneen inuu sameeyo qof Daaci ah oo diin xambaarsan.

11. Daaciga guuleysta waa midka wuxuu karo ku caawiyo walaalkiisa muslimka ah ee hiil iyo hoo la garab taagan.

12. Daaciga guuleysta waa kan ka walwala oo ay walbahaarineyso waxyeelada iyo masiibooyinka muslimiinta ku habsada meel kastaba haku noolaadeene.

13. Daaciga guuleysta waa kan soo dumidda iyo dhimrinta badan ee u garab raariciya bulshada.

14. Daaciga guuleysta waa kan wax hagaajiya ee asaga wax haleynin oo toosinta iyo tusmada la dhinac taagan bulshadiisa.

15. Daaciga guuleysta waa kan aan aheen lajiraha dadka iska raacsan wax kasta oo ay sameeyaan xumaan iyo samaanba, ee waa midka mar walba dariiqa xaqa ku toosan ha dad bato ama ha dad yaraadee,.

Guulihii Dacwada iyo Ducaadda

Howl kasta iyo halgan walba oo loo kaco waxa uu yeelanayaa guulo la xuso oo lagu faaano iyo guul darrooyin la sheego oo lagu wax barto oo waayo arag lagu noqdo. Nus qarnigii la soo dhaafay Culumada iyo docaadda Soomaaliyeed waxay muujiyeen howl libineed oo way ka guul keeneen halgankii dacwadeed ee mudada badan ay soo wadeen, wax yaabaha laga xusi karo guulahooda waxaa ka mid ah:

1. Hirgalinta Tawxiidka iyo la dagaalanka Shirkiga

Walow Soomaalida ay muslimiin sunni oo shaaficiya ahaayeen waligoodba hadane waxa jiray waqtiyadii dhexe madmadow diineed iyo mugdiga jahliga oo dad badan ka duway dariiqii toosnaa ee xaqa. Qeybo ka mid ah Kooxaha dariiqooyinka Suufiyada waxay horseed ka noqdeen shirki sal dhigay inuu ka abuurmno dhulka geeska Afrika, shirkigaaso markiisii hore ku bilowday dadkii wanaagsanaa oo saalixiin ahaa oo aad loo buubuuniyay geeridoodii ka bacdi. Waxa aad loo muujiyay dadkii wanaagsanaa qabuurtoodii, kolkii hore xoolo qal iyo siyaaro ayay ku bilaabatay ilaa la gaarsiiyay in xabaalaha loo tago dhowr arrimood oo Allaah mooyee aan cid kale aysan kari karin, tusaale:

- In shardi lagalo: waxyaabaha shardiga lagala soo galo xabaalaha waxaa ka mid ah,
- in awlaad la weydiisto,
- in baadida maqan laga baryo badbaadadeeda ,
- in caafimaad la weydiisto.

- Kaaga darane waxaaba caado noqotay in Allaah cid kale lala xiriiriyo oo baryada la dhaho Ilaah iyo sheekh hebalow ama aw hebalow, waliba waaba laga sii dheereeyay oo waqtiyada culeesaadka iyo masiibooyinka dhacaan waa la illoobaa Rabbi waxaa loo qeylo dhaansadaa sheekh hebel iyo aw hebal kaliya , mowto iyo dad mar hore dhintay ayaa maamulkii koonka wax laga siiyay ilaa qoraalada qaar lagu qoro wax aan caamadaba qaadan karin qof cilmi leh warkiisa daaye, sida
- Waxa dhulka fidiyay sheekh hebal.
- Waxa Badda naga haaya sheekh hebal iwm.

Heerkaasi ayuu shirkiga gaaray, cid isku howsha ama u kacda ma badneen , dhamaadkii qarnigii toban iyo afaraad ee hijriya wax si tartiib ah dalka u gaartay dabeeshii baraaruga diineed oo ay hormuud ka ahaayeen ducaad u badan dhalin yaro oo Wax ku soo baratay Xarameynka. Waxay dacwo fadin ka bilaabeen masaajida iyo goobihii waxbarashada ee dalka, walow mucaaradad badan ay kala kulmayeen duruqdii suufiyada iyo dowladda oo isu kaashaday la dagaalankooda, hadana way u babac dhigeen culeeskaasi, waxay si dhaqso ah u heleen dhalinyaro dhiifoon oo dhawaqii dacwada si kal iyo laab ah u ajiibtay.

In muddo ahba loolankii labada dhinac u dhaxeeyay xowli ayuu ku socday, xukunka dilka ah iyo xarigii culumada lagula kacay cabsi iyo caqabad kuma noqonin fididii dacwada tawxiidka,

Bulshada la daalaa dheceysay dabinadii shiyeeyaha gaaleed ee diinta barashadeeda looga horjoogay waxay heleen daaqad yar oo ay ka helaan dabeesha diineed ee dowladda caburineyso in dibadda u soo baxdo.

Burburkii xukuumaddii Kacaanka kadib waxa dardar xoogle sii galay culumadii iyo ducaaddii oo fursad u helay markaan in si xor ah ay u gudbiyaan dacwada diineed culees iyo cabsi la;aan. Balad iyo baadiye, degmo iyo tuulaba iftiinkii Tawxiidka ayaa gaaray, Shirkigii waxa uu noqday mid shiiqa oo meelo kooban kaliya ku eg. Bulshada Soomaaliyeed inteedii badaneed waxay dhadhansadeen macaanka Tawxiidka , kooxihii marin habaabinta waday waxay noqdeen geeri go'an iyo kuwo go'doonsan, waa sidii tuke canbaar leh oo taageero kuma laha bulshada dhexdeeda.

2. Xijaabashada Dumarka

Dhaqanka soomaalida ee sal kiisa uu ka soo jeedo baadiyaha walow meelo badan uu ku wanaagsan yahay oo shareecada uu ka waafaqayo ay jirto, hadane waxaa laga dhex helayaa khaladaad muuqdo oon la daah saari karin sida qaawanaanta dumarka oo soomaalida badankeeda u aheed caado iyo dhaqan lagu faano tusaale: Waayihii hore gabarta Soomaaliyeed inta aan la guursanin timaha way tidcan jirtay madaxana wax maro ah inay saarto waxay aheed ceeb iyo dhaqan xumo laga xishooda. Waxa Maanta loo yaqaan Shaash saarka oo la sameeyo galabta maalinta todobaad ee aqalka laga joogo,inta xaflad la mid ah tii arooska la

dhigo oo lagu shaash saaro gabarta aroosadda ah waxay ka soo jeedaa dhaqankii hore baadiyaha, oo gabarta aysan wax maro ah madaxa saaran jirin ka hor inta laga aroosayo, waxaaba jirta oraah ay soomaalida isticmaalaan ilaa hadda oo ah (Heblaayo yaa Hagoogay) oo macnaha loola jeedo uu yahay (haddey gabarta niman badan soo guursatay marka leys waydiinayo ninkeedii ugu horreyay ayay oraahdaas soomaalida dhihi jirtay Heblaayo yaa Hagoogay) meeshaasi waxa ka cad in gabarta Soomaaliyeed waayihii hore aysan xijaaban jirin oo madax qaawanaan jirtay haba ahaato tu qaangaar ah ilaa laga guursadana ay sidaasi ahaan jirtay.

Markii magaalooyinka Soomaalida u soo yaacday, waxa maamulka dalka hayay gumeystihii gaaleed ilaa laga soo gaaro xukuumadihii calmaaniyada ku dhisnaa ee talada ka dhaxlay Talyaaniga iyo Ingiriiskii tagay. Dumarkii magaalooyinka soo galay wax weyn iskama badalin dhaqankii baadiyaha ee qaawanaanta ahaa waliba waxa markan loo arkayay ilbaxnimo iyo xadaarad, dowladdii kacaanka waxay sii dhiirri galisay diin la'aanta iyo qaawanaanta dumarka, iskuulaadka waxay gabdhaha ku dhigan jireen saraawiil iyo shaarar, tan ugu badan ayaa goonno gaaban xiran jirtay oo bilaa qamaar oo madaxa qaawan yahay taasi oo sii marin habaabisay dumarka.

Hanuunka xag Allaah ayuu ka yimaadaa ayadoo sidaas uu yahay xaalka dumarka iyo xijaab la'aantooda waxa mark kaliya soo ifay nuurkii dacwadii diineed ee culumada iyo ducaadd ay

horwadeenka ka ahaayeen, walow cadaadis badan iyo colaadin ay markiiba kala hor yimaadeen duruqdii suufiyada iyo dowladda kacaanka oo isku duuban hadana uma istaagin dacwada sii fideysay oo waxay muujiyeen ducaaddii dulqaad dheeraad ah. Muddo yar kadib waxa xijaabka xirtay gabdho badan oo ku dhiirraday inay ku dhex maraan suuqyada iyo meelaha ay bulshada ku kulanto.

Markii hore dumarkii xijaabka qaatay waxay erayo xun caay iyo aflagaado kala kulmi jireen kaadiriintii kacaanka iyo taageerayaashoooda oo si weyn ugu jajabnaa shuuciyada ku dhisan diin la'aanta, waxay sameen jireen caruurta inta ay abaabulaan ayay ku orin jireen oo tuuryana ugu daraayeen gabar kasta oo xijaaban marka ay jidadka mareyso, Laakiin taasi ma hor joogsan qaadashada xijaabka. Marba marka ka sii danbeysaba waxa sii siyaadeysay wacyiga iyo aqoontiii diineed ee bulshada maadaama ay ducaadda si joogto ah u faafinayeen dacwada islaamka, taasi oo ka dhigtay badi dumarkii magaalooyinka joogay inay wada xijaabtaan.

Burburkii xukuumaddii kacaanka kadib culumada iyo ducaadda waxay heleen fursad dahabi ah oo dacwada ay ku gaarsiin karaan bulshada bilaa teed iyo talis la'aan, dacwa shaarica oo ah jidadka wanaaga layska faro iyo xumaantana layska reebo waxay noqotay mid joogto ah, taasi oo u sahashay bulshada in si fudud ay cilmi dhagood badan ku xambaaraan.

Xalqooyinka cilmiga laga barto ee masaajida dhexdooda salaadaha kadib waxay noqdeen mid ay buux dhaafiyeen arday badan oo cilmi doon ah, masjid kastaba waxa laga sameeyay qeyb danbo oo daah lagu xiray si dumarka ay ugala socdaan duruusta masaajida ka socoto. Dugsiyadii Qur'aanka waxa lagu dhiirri galiyay in dumarka yimaadaan xilliyadooda firaaqada si ay wax uga bartaan kitaabka Rabbi, maalmaha khamiisti iyo jimcihiina waxa dugsiyada laga joogteeyay xilliyada galbihii ah muxaadaraad dumarka khuseeya. Waxa marakii danbana la furay goobo maraakis ah oo lagu fidiyo dacwada waxna lagu baro si gaar ah dumarka.

Howshaasi baaxadda leh ee ducaadda ay ku bixiyeen waqtigooda qaaliga ah, hanti iyo nafbana loo huray waxay miraheedii uu noqday in ay dumarka xambaaraan wacyi diineed oo aad u sarreeya kaasi oo ka dhigay in dumarkii ku dhaqnaa balad iyo baadiyaba badidooda ay wada xijaabtaan. Maanta aan joogno waxa dhif iyo naadir ah ama lagu yaabayaa in la arko gabar aan xirneen jalbaabka noocuu doonaba ha ahaadee, walow magaalooyinka qaar dumarka ku dhaqan ay dib u socod bilaabeen ayagoo dhigay xijaabka meelaha qaar qaatayna dhar qaawanaan xigeen ah, sidaas oy tahay waa tiro yar inta maryaha qafiifka ah xiran waxa mar kastaba gudaha dalka balad iyo baadiyaba ku badan dumarka xijaaban.

Sababahii suura galiyay Guulaha ay Ducaadda soo Hooyeen

Wax kastaba qadarta iyo qoraalka Rabbi ka sokow waxay leeyihiin sabab loo aaneeyo inay suuro gal noqoto howshaasi loo kacay ka miro dhalinteeda, guulaha balaaran ee baraaruga islaamka uu ku talaabsaday xagga dacwa faadinta marka loo fiiriyo arrimaha laga lib keenay waxa loo sababeyn karaa:

Qof kastaba waxa uu si dhab ah u aamino ayuu ku dhaqaa nafsadiisa , ehelka iyo awlaadiisa, cidna wax uusan aamin saneen amaba mugdi uu kaga jiro kuma dhiirrado inuu ka muuqdo muuqaalkiisa kore amaba uu ku dhaqmo, Tusaale:

Culumada iyo Ducaadda soomaaliyeed waxay u babac dhigeen kadeedkii kacaanka marnaba kama tagin faafintii dacwada wayba ku sii dhiirranaayeen mar kasta oo loo dhibo darteed, sidaasi oy tahay aadane ma dhameys tirno, oo gaabis iyo gafafba lagama waayo, Qeybihii dacwada ee ducaada ay xoogga saaraayeen wax si rasmi ah u hirgalay amaba noqday mid miro dhal ah waa dhowr arrimood sida

1. Hirgalinta Towxiidka iyo la dagaalanka Shirka iyo

2. Xijaabashada Dumarka

Labadaasi arrimood waa waxa ugu weyn ee Ducaadda soomaaliyeed ay ka guul gaareen waxaana keenay taasi markii horaba labadaasi arrimoood ayaga ayaa si dhab ah u aaminay oo kaga dhaqmay haddey ahaan laheed naftooda, ehelkooda iyo aqribada iyo asxaabta ku dhawdhaw.

Nin kasta oo daaci ah waxa uu ku tartarsiiyay bulshada ku meersan inay ka fogaadaan shirkiga, dumarkana ay xijaabtaan, arrinkaasi oo xoog badan uu isu geeyay waxay noqotay mid miro dhasha. Haddii uu naftiisa ugu horreyn shirkiga ka fogaaday ehelkiisana uu ka fogeeyay, dumarkii xigayna uu xijaabay waxay bulshada kale u arkeen mid xaq ah maadaama uu asaga bulshada kaga horreeyo dhaqan galintooda.

Taasi cagsigeeda waxa jiro arrimo muhiim ah oo aad ay uga gaabiyeen ducaadda waxayna sababtay ilaa maanta in aan bulshada laga suulinin arrimo aad u liito marka loo fiiriyo xag diineed.

Gaabiska Daaciga

"Nimca waliba nusqaanteeda ayay leedahay" Daaciga u taagan Rabbi dartiis ee diinta faafinteeda ka qaadanaaya door muhiim ah, dadaalkiisa badan waxa ku lamaansan gaabis iyo cajis sababa fursado badan oo in laga faa'ideysto diyaar u ahaa iney dayacmaan, ama dunuubo ku haboonaa in si aad ah loola dagaalamo in laga gaabiyo, waxaan halkan ku xusi doonaa arrimo ay ducaadda ka gaabiyeen mudadii ay dacwada soo socotay:

1. Danbi la galo waxa u weyn shirkiga, waayihii hore soomaalida jahliga la degay darteed si weyn ayuu shirkiga saldhigay, wax kasta oo Allaah gaar u alahaa cid kale ayaa lala wadaajiyay, mowtada aad ayaa loo darajeeyay ilaa la gaarsiiyay heer shardi laga galo, waxa lagu roob dooni jiray qabuuraha dushooda si loo barakeesto, baryada Rabbi waxa lagu xiriirin jiray dad mar hore dhintay.

Ayadoo arrimaha sidaas yihiin culumada iyo ducaadda baraaruga islaamiga waxay holw wayn ka qabteen la dagaalanka shirkiga iyo hirgalinta towxiidka, culees iyo caqabado kasta oo ka horyimidna way u babac dhigeen. dadaal dheer iyo dulqaad badan kadib waxa suuro gashay in qeybo badan oo bulshada ka mid ah laga saaro mugdiga jahligii ee shirkiga loona bixiyo iftiinkii Tawxiidka.

Shirkiga ay umaaddeena ku dhaqmi jirtay ee ahaa kan caadiga ah la wada yaqaan ee qabuuriyiinta sameeyaan sida baryada, gowraca, shardiga, magangalyada, kaalmeysiga,iwm kaasi si weyn ayay wadaada ula dirireen, maadaama ay ka bari noqdeen iskana fogeeyeen shirkiga ku dhaqankiisa, ehelkoodana ay xoogga saareen si ay uga fogaadaan ku

dhaqanka shirkiga, umaddii kalena way kaga dayatay wanaagaasi oo dacwadii la dagaalanka shirkiga way hirgashay. Waxayna umaaddii wada qaadatay Tawxiid barax tiran marka laga reebo in yar oo bulshada ka mid ah oo dano aduunyo jaceel u dulfadhiyo qabuuraha.

Teeda kale shirkigaas kore midka aan ka liidan ee xeerarka iyo qawaaniinta khilaafsan shirciga ku dhisan Soomaalidana ay aadka ugu dhaqanto balad iyo baadiyo, walow wadaadada ay markoodii hore xooga saareen ka hadalkiisa iyo in bulshad looga digo, hasayeeshee marna kama marneen ku dhaqankiisa, iskamana bari yeelin taasi oo keentay in loo arko shey caadi ah oo laga roon yahay sameyn tiisa haddii laga maarmi waayana uu banaan yahayba.

Tusaale

Dhacdooyinka caadiyan bulshada ka dhex dhaco haddii wadaad iyo mid kale oo bulshada ka mid ah wax dhex maraan labada tol ayaa fariista waxaana la waafajiyaa garta xeerarkii baadiyaha, haddii ay maxkamad in la tago noqotana waxa lagu dhaqmaa dastuurka iyo qawaaniinta la dajiyay ee shareecada khilaafsan. taasina waa midda bulshada u muuqata kana dhigtay shirkigaasi mid aan laga tagin ilaa maanta.

Dowladdii lagu soo dhisay magaalada Carte ee Jabuuti ee Cabdi Qaasin Salaad Xasan madaxweynaha ka ahaa baarlamaankeeda waxa ku jiray oo waliba ka dhex muuqday wadaado waa weyn oo Soomaalida si weyn u taqaano, sidaas oo tahayna waxay hore u sheegi jireen golaha Baarlamaanka ay xubinta ka noqdeen in uu yahay gole sharci dajin, diiniyana aan laga mid noqon karin gole shuruucda dajiya inta shareecadii Rabbi la hareer qaaday.

Shirkiga Dastuurada iyo qawaaniinta ah wali wadaadada qaar way u qiil dayaan waxayna ku sii dhiirranayaan maalinba maalinta xigta in ay ka mid noqdaan golayaasha sharci dajinta iyo garsoorka oo shareecada Allaah si weyn u khilaafsan. Bulshadii kalena waxayba heleen daliil adag maadaama ay wadaadadiiba meesha uga horreyaan. Tan waxa lagu tilmaami karaa inay tahay fashilka ugu weyn ee soo wajaha baraaruga islamka.

2. Wax yaabaha dhibaatada badan umadda ku haayo waxaa ka mid ah oo shirkiga soo labeeyo qabyaaladda iyo qabiileysiga oo salfaday wadajirkii iyo midnimadii bulshada, waxay sabab u noqotay qaran burburka Soomaalida iyo qaxootiga dagaagaaya dunida oo ilaa maanta darteed looga soo kabsan la'yahay. Hore ayaa loo yiri "Fiqi Tolkii Kama Janno Tago" Culimada iyo Ducaadda soomaaliyeed waxay ku dhex bariiqdeen dhiiqadii qabyaaladda, wadaad kastaba tolkiisa ayuu la duubtay marka laga reebo inyar oo fara ku tiris ah, inkastoo aysan si toos ah ula safan qabiilada dirirta ay dhex taalay hasayeeshee urur diimeedyadii ay wadaadada iyo ducaadda ka kala tirsanaayeen marka koox kastaba dhexdeeda uu ka dhasho khilaaf waxay qeybo ka mid ah isugu hiilinayeen qaab beeleysi dadban ilaa urur diimeedyada qaar ay ku dhisan yihiin qabiil iyo qoleysi mutaxan.

Kooxaha Islaamiyiinta qaarkood caawinaadda ay dibaha ka helaan haba ugu badnaato deeqda waxbarashada si caddaalad uguma qeybiyaan xubnaha ururka hadba hogaanka cidda ay is xigaan ayaa loo xagliyaa,

waxayna taasi keentay in wali qabyaaladda loo arko shey caadi ka ah umadda dhexdeeda maadaama wadaadadii diinta qaarkood ay kaga horreeyaan bulshada kale.

3. Dadka dacwada faafiya waxay fududeystaan wax macna weyn u yeelan kara diinta islaamka balse iyaga xagooda wax yar ka ah waana dhalinyarada in dhexdooda lagu faafiyo diinta islaamka si ay u taageeraan baahinta dacwada, inkastoo dhalin yara-nimadu tahay xilli isbedel iyo koriinsho, hadana waxey baadi goob ugu jiraan jawaabo ay naftooda u baahan tahay in laga siiyo diinta islaamka, haddii aan la daboolin baahida diineed ee ay dareemayaan waxa dafaaya kooxaha baadhilka iyo bidco wadayaasha waa firqooyinka qaloocan sida Shiicada iyo Takfiirka oo si xoogan baryahaan ugu faafaya dhulalka Muslimiinta.

4. Culumada iyo Ducaada Soomaalida waxay aad u sahladaan ama aysan ku baraarugsaneen muhiimada badan ee qoraalka uu lee yahay, iskama indho tiraayo waan ogahay dad ka mida baraaruga oo wax qora iney jiraan, laakiin waxa ceeb nagu ah in afka aan ku hadalno oo umaddeena aan ugu muxaadareyno hadane aan ka xishoono in aan wax ku qorno si ay bulshadeena ugu faa'ideyno barasha diinta iyo taariikhdooda uu gumeystaha gaaleed dagaalka kula jiro si uu u baabi'iyo.

Anagoo ogsoon siyaasi iyo calmaani kastaba inuu wax xarxariiqo, oo hadane qoraalada uu sameeyo diin laawe kastaba bulshada Soomaalida intooda wax aqrisa aad u riyaaqaan aqrintiisa maadaama badiil kale uusan jirin., hadane Waxaan la yaabanahay Culumada iyo Ducaada aad u kheyrka jecel ee daafaha dunida isaga gooshta si dadka ay u gaarsiiyaan dacwo sax ah, maxaa ka hortaagan iney buuxiyaan kaalintan aad moodo in loo baneeyay kaliya dadka u doodo afkaaraha soo galootiga ah ee cuskan dhaqamada iyo caadaadka gaalada.

5. Waxaad moodaa da'yartii dunida in lagu mashquuliyay aaladda netka oo ay ku bixinyaan waqtigooda badankiisa, Aaladda Internetka qeybihiisa kala gadisan siiba baraha bulshada oo muhiimad badan u lahaan lahaa fidinta Dacwada way ka gaabiyeen Ducaadda Soomaalida oo aad ayay ugu yaryihiin isticmaalka iyo adeegsigiisa waa yaabe maxaa ka manciyay, waaba meesha kaliya oo la dhihi karo saameyn iyo raad badan ayay dacwada ku reebi laheed bulshada haddii loo isticmaalo faafinteeda oona lagu laro hab sareeya oo soo jiidasho u leh dareenka aadanaha gaar ahaan dhalinyarta.

Cadawga Dacwada

Wax kastaba waxay leeyihiin xaasid iyo cadaw la xarbiya oo jecel inay baaba'do oo aysan lib iyo liibaan gaarin cid aan isaga aheen. Cadawyada dacwada way tiro badan yihiin oo midabo iyo muuqaallo badan yihiin cadawyadaasi mid mutaxan iyo mid maldahan oo nagu dhex milan way leeyihiin

1. Kooxaha Macatableyda ee wax gaaleysiiya reer galbeedka waxay aad ugu dadaalaan barashada diinta si ay ugu marin habaabiyaan bulshada Muslimka ah, ayaga oo adeegsanaaya hab iyo xeelado aad u sarreeya. waxa dhisan kooxo u abaabulan sida hay'ado gargaar oo dalal badan oo dunida ah ka howl gala, qorshaha iyo ujeedkoodana waa gaaleysiinta Muslimiinta tabaaleysan ee ku dhaqan meelaha ay masiibooyinka ka dhaceen sida daadadka, abaaraha, dhul gariirada, iyo dagaalada sokeeye.

Duruufaha nololeed ayay uga faa'ideestaan bulshada waxayna ka dhex abuuraan koox aan gaalnimada muujisan hasayeeshee ula dagaalanta dacwada iyo ducadda si dadban, waxayna aad u adeegsadaan saxaafadda ayaga oo magac xumeeya ducaadda howl karka ah, kana faafiya been iyo dacayado aan sal iyo raad laheen.

2. Cadawga muuqda sida gaalada waxa mar kastaba ka qatar badan cadawga qarsoon kaasi oo ku dhex milan dadka Muslimiinta ah, kooxda munaafaqiinta waa soo jireen tan iyo saxaabadi waxayna mar kastaba la taagan yihiin hagardaamo iyo ineyka bixiyaan sawir khaldan diinta Islaamka iyo dadka Muslimiinta ahba. Haddii aan laga digtoonaan oo

aan la helin manhaj Dacwo oo diyaarsan, waxa munaafaqiinta u sahlan iney safka hore ka galaan Ducaada, halkaasina ka dhalato masiibo aan la xakameyn karin, waxa had iyo jeer halis loogu jiraa gaarista dacwo khilaafsan diinta islaamka bulshada Muslimka ah meel kasta oo dunida kaga dhaqan yihiin.

Cid kastana way ka dheregsan tahay inaysan jirin wax ka khatarsan cadawga qarsoon ee munaafaqiinta waa kii uu abwaankii ku maansooday:

- Baadida ninbaa kula daydayi daalna kaa badane.
- Oo aanan dooneyn inaad heshaa daa'in abidkaaye.
- Dadkuna moodi duul wada dhashoo wax u daahsoonene.
- Dallana malaha aakhiro haddii loo kitaab dayaaye.

3. Jaahil isla weyn oo dantiisa ka dhex arkay dacwada diineed kaasi oo khaladaadkiisa u qiil dayo oo doonaayo inuu iska dhigo caalim, maryaha uu xiran yahay ayuu ku khaldaa caamada muslimiinta ee khayrka jacel, kaasi bulshada aad ayuu u marin habaabiyaa.

Faafinta Dacwada

●Fidintiyo faafin dacweed waa fadliyo dheeraade.

●Kheyrkiyo wanaagoo leys faraa waa faral diineed.

●Faham dheeraad ahiyo fiqi loogama maarmo'e.

●Hadaan loo fikireynin waligeed marna ma faafteene.

● Waxa Dacwada loo fidiyaa qaab kastoo furane.

●Fataalnimo qorsho foorariyo uma roono fudeyd.

● Fiiro dheer iyo aragti fogaa lagu fuliyaa howl.

W/T: Luqmaan Xamraawi

Isbadalka waayaha waxay saameeyaan nolosha qeybaheeda kala gadisan hab walba iyo qaab kasts oo la isticmaali jiray kal hore waxa uu hadba waqtiba waqtiga ka danbeeya u baahan yahay horumarin iyo casriyeyn, ma'aha waxa aan ka hadlaayo Diinta ee waa qaabka loo faafinaayo oo dadka kale loo gaarsiin lahaa, ama wanaaga leysu fari lahaa, xumaantana leysaga reebi lahaa, taasi oo u baahan mar kastaba wasiilo iyo wadooyin cusub si looga dhigo Dacwada tu diyaar ku ah meel kasta iyo mar walba, oo cidii hanuun doon ah ay si fudud uga haqab beeli karto.

Hasayeeshee horaa loo yiri awka danbe kan hore saan qaad kiisa ayuu leeyahay, waxaad moodaaba in hal qaab iyo hab kaliya ay wada raaceen inta badan Ducaada Soomaalida, maadaama midba kan ka horreyay uu kaga dayanaayo xaga Diin barida iyo Dacwo faafintaba.

Waxaa caado ab laga soo gaar ah iska noqotay dacwada in Masjidka ay ku ekaato oo banaanka aysan u soo bixin marka laga reebo marar dhif ah, waxa taasina ka dhashay in la qariibsado cidii wanaaga kaga hadasha

meelo ka baxsan meeshii lagu bartay, walow la dhihi karo deegaanada Soomaalida taasi way ku kala duwan yihiin.

inkastoo ay jiraan ducaad iyo culumo ku baraarugsan in is badal muuqda oo lagu sameeyo hababka loo fidiyo dacwada, balse dadaalkooda ma'aha mid kaafin kara baahida jirta, maadaama ay aad u tiro yar yihiin marka loo fiiriyo guud ahaan ducaada kale oo aad ugu mintidaya hababka qadiimiga ah oon ogaleen in wadooyinka cusub ee Dacwada faafinteeda muhiimka u ah ay isku taxalujiyaan.

In la hormariyo Wadooyinka Dacwo faafinta

Inkastoo wax kastaba Allaah suurtagal ka dhigi karo hadana sabab ayay leeyihiin loo tiiriyo, waxa mudan in aad loo bogaadiyo culimada iyo Ducaadii hore oo dadaal iyo juhdi badan galiyay si halganka ay uga lib keenaan, taasina wax badan oo ka mid ah way xaqiijiyeen, waxa u suurowday inay xaqa u soo dumaan dad badan oo dariiqa baadida ku habowsanaa. waxa hore loogu maahmaahay Nimco waliba nusqaanteeda ayay leedahay, xowligii kal hore dacwada ay dalka ku soo gashay hadda gaabis badan ayaa ku yimid taasi oo loo aaneyn karo sababo badan oo ay ka mid tahay:

1. Dhalinyada badan kooda goobaha cilmiga shareecada lagu barto lagama helo, walow Masaajida ay camiran yihiin xilliyada salaadaha, laakiin iskaba daa iney dersi dhageystaane, xitaa Khudbo jimcaada

dhugmo badan uma laha da'yarta wacdiga socda iyo wadaadka meesha taagan, waxayba mashquul ku yihiin iney ciyaaro ka sheekeystaan.

2. Marba marka ka danbeysa waxa sii siyaadeysa baahida diineed ee dhalinyarta iskuulada iyo jaamacadaha dhigta, maadaama ay si tartiib ah uga sii fogaanayaan hababkii u sahli lahaa barashada diintooda, taasi oo ugu wacan ineyba dib u dhac u arkaan qaababka hadda ay culumada u faafiyaan dacwada iyo xalaqaadka cilmi barashada.

3. Wixii ka danbeeyay markuu bilowday dagaalka ay reer galbeedka horkacayaan ee loogu yeero la dagaalanka Argagixisada, waxa cabsi badan la soo daristay qaar ka mid ah ducaada oo culeesaad badan kala kulma dowladaha iyo maamulada dunida ka jira ee taabacsan siyaasadaha reer galbeedka, waxay taasi keentay inay in badan ka gaabsadaan fidinta dacwada marxaladda lagu jiro darteed si aan loogu eedeynin xagjirnimo iyo xisbiyo gaar ah oo dagaallama inuu gacan saar la leeyahay.

Habka iyo Qaababka kala duwan ee Dacwo Fidinta

Faafinta dacwada marka laga fiiro meelo badan waxay ku haboon tahay in wax badan lagu kordhiyo qaabka ay hadda ku socoto si sare loogu qaado rajada laga qabo iney soo baxdo natiijo wax ku ool ah, Waxa lagama maarmaan ah in la hindiso mar kastaba iyo meel walba oo lagu sugan yahay hab iyo qaabab cusub oo si sahal ah dacwada loo fidin karo si loogu hagar baxo faham siinta dadka diintooda toosan.

Ilaah ayaa hanuunka haaya waxaase nala faray dadaal iyo isku day, qallafsanaanta maha wax qalooc lagu toosin karo laakin hadalka jilcan ayaa soo jiita qalbiyada bini aadamka, si kasta oo qofka u marin habawsan yahay hadlka jilcan iyo naxariista way soo dumaan ee kama sii dudaayo, taasina waxay sahli kartaa inuu u dhag raariciyo erayada aad ku dhahayso, ugu danbayntiina uu kaa qato khayrka aad sheegayso.

Waxaa jira wadooyin dhowr ah oo loo mari karo faafinta dacwada si loo helo dad fahan dhab ah ka heysta diinta islaamka. waxaan hoos ku tixi doonaa ilaa sideed qaybood oo kala duwan oo bulshada ka kooban tahay habka loo gaarsiin karo dawco miro dhasha oo ay wax ku qaataan dad badan oo dariiqa saxda ah hareer marsanaa markooda hore.

Habka iyo Qaababka Dacwada looga Fidin karo Masjidka

Masjidka waa saldhigii iyo asaaskii ay dacwada ka duuli laheed, sidaan wada ognahay markuu Nabigeena (scw) u soo hijrooday magaalada Madiina howshii ugu horreysay ee uu qabto waxay aheed dhisidda Masjid ay Muslimiinta isugu yimaadaan si ay ugu tukadaan salaadaha, una noqdo saldhig iyo madaxtooyo Muslimiinta looga arrimiyo.

Muhiimadda uu leeyahay Masjidka waa mid ka muuqato sooyaalka taariikheed ee Muslimiinta, waxa uu ahaa Masjidka

- Meel lagu cibaadeysto oo Rabbi lagu caabudo.
- Madaraso iyo dugsi cilmiga lagu derso.
- Madaxtooyo iyo xarun maamul
- Xero iyo talis uu ciidanka ka duulo
- Xarun gargaar oo bulshada looga gurmado.

Howlahaasi badan ee Masjidka uu qaban jiray cahdigii saxaabada walow ay wax badan is badaleen oo aysan sidii hore aheen haddana Masjidka wali waa meesha kaliya ee u badbaaday Muslimka ee uusan saameyn badan ku yeelanin burburka baaxadda leh ee Muslimiinta asiibay mudadan halka qarni ka badan.

Mar iyo meel walba oo la joogo Howl kasta oo dacwadeed waxa sal iyo gundhig u ah Masjidka waa meesha la rabo inay ka bilaabato ugana baxdo banaanka si ay u gaarto goob iyo guri kastaba, si loo xoojiyo dacwada Masjidka ka socota waxa lagama maarmaan ah in la helo qorsho

iyo jadwal howleed loo agaasimo fulinta shaqada dacwadeed. Qodobadaan hoose waa qeyb ka mid ah habsami u socodka arrimaha muhiimka u ah sare u qaadida dacwada masjidka.

1. In la sameeyo guddi ka kooban culumada, ducaadda iyo odayaasha jamaacada masjidka waxayna gudigaasi howshisa noqoneysaa

- Maamulidda masjidka
- Faafinta iyo horumarinta dacwada
- Samafalka iyo saacidaadda bulshada
- Hagaajinta iyo horuminta arrimaha bulshada
- Musaalaxada iyo wanaag dhex dhigidda bulshada

1. In la qabto Nadwooyin iyo kulamo dacwo oo xilliyaysan, laguna casuumo Culimada iyo Ducaada ugu caansan, oo dhalin yarada ay ugu jecel yihiin, maadaama ay aad u tiro badan yihiin dhalinyarta wali uu iimaankooda qoyan yahay ee baraarujinta u baahan.

2. In laga aqriyo duruus iyo kutubo masaajida aadka u camiran xiliyada salaadaha adinka iyo aqinka dhexdooda.

3. In la sameeyo xalaqaad Quraanka lagu xifdisiiyo bilaha fasaxyada ardada dhigata iskuulada iyo jaamacadaha si sare loogu qaado aqoontooda diineed.

4. In lala socdo xaaladaha duruufeed ee jamaacada ku xiran masjidka, qofka dhibaateysan in la caawiyo ama loo raadiyo cid kale oo caawin karta.

5. In la booqdo dadka aan soo xaadirin salaadaha ee masjidkana dariska la ah, si loogu soo dumo inuu jamaacada ka mid noqdo.

6. In loo sameeyo masjidka meel lagu dhajiyo warqadaha ogeysiiska si jamaacada ku xiran masjidka ay ula socota duruusta iyo muxaadaraadka.

7. In la sameeyo dacwo shaqsi ah si qofba gaarkiis loogala hadlo waxa markaasi ka si ah amaba gafafka muuqdo si ay ugu noqoto waano iyo wacyi galin shaqsiyadeed oo asaga un ku eg.

8. In la qabto tartamo xilliyeysan oo lagu soo beego bisha Ramadanka iyo bilaha fasaxyada iskuulada, tartamadaasi oo la xiriira xiftinta kutubta yar yar ee diiniga ah lagu bixiyo abaal marino kala duwan.

9. in la qabto muxaadaraad isbuucle ama bille ah oo mowduucyo muhiimad badan leh oo macno weyna xambaarsan looga hadlo si wacyiga diineed ee bulshada sare loogu qaado.

10. In laga sameeyo masjidka maktabad kutubo badan la dhigo , si taasi qaab sahlan ay ugu hirgasho in jamaacad masjidka qofba inta uu karo uu kutub ku deeqo, waxay maktabadaasi u noqoneysaa dadka cilmi doonka ah meel kheyr ah oo ay kaga mashquulaan maalaa yacniga, waxayna

tusaale u noqoneysaa haddii ay maktabadaha bataan in bulshada wax akhriskeedana uu kordhaayo taasi oo ka dhigan inuu jahliga sii suulaayo.

11. In laga shaqeeyo musaalaxada iyo in wanaag la dhec dhigo jamaacada masjidka ee is fahmi waaga soo dhex galo, haddii taasi la gaaro waxay hordhac u noqoneysaa in la helo bulsho aan xeerar iyo xukunno maxkamadeed u baahneen oo ayaga xalisada khilaafaadkooda.

12. In la sameeyo tabarucaad dhaqaale oo bil kasta ah si loo caawiyo masaakiinta ka mid ah jamaacada iyo in lagu daboolo baahida masjidka.

13. In ducaada ay dadka u noqdaan ku dayasho wanaagsan oo dabci wanaag iyo dulqaad laga helo si ay u soo dumaan dadka jamaacada masjidka ah.

14. In khudbada jimcaha loo diyaariyo si soo jiidasho leh oo taabaneysa qalbiga dhageystaha, marba lagu soo qaado mowduuca isbuucaasi taagan.

15. In ay sameeyaan kulamo khadhiibyada masaajida isu dhaw ee degma kuwada yaal, si ay ukala qaataan fikradaha iyo habka loo dardar galin karo dacwada.

16. In la sameeyo fadhiyo masjidka dhexdiisa oo dadka ay su'aalo toos ah ku weydiin karaan Culumada hadba mowduuc gaar ah, oo markaasi baahidiisa taagan tahay.

17. In la sameeyo Istuudiyo masjidka ka mid ah oo oo ardada cilmi doonka ah ay ka heli karaan duubista iyo ku shubidda kutubada iyo barnaamijada diiniga ah si bilaash ah.

18. In xooga la saaro akhrinta kutubada siirada iyo muxaadaraad kala duwan oo mowduucyada ugu badan ee ay khuseeyaan uu yahay

- Taariikhda islaamka,
- Fitanta iyo calaamaadka saacadda qiyaamaha,
- Qabriga iyo xaaladaha geerida kadib,
- Jannada iyo naarta

19. In laga sameeyo masjidka bisha Ramadaan afuris loogu talagalay dadka aan tabaaleysan ee bulshada ka mid ah.

Habka iyo Qaababka Dacwada looga Fidin karo Goobaha waxbarashada

Iskuulada, Madaarista, Macaahidda iyo Jaamacadaha waxay safka hore kaga jiraan goobaha ugu muhiimsan ee bulshada halbowlaha u ah, waa meel ay soo marto cid kastaba yaraanteedii. Meeshaasi muhiimadda leh haddii ay cadaw u gacan gasho amaba manaahij khilaafsan shareecada laga dhigo waxay galaafaneysaa jiritaankii umaddeed waa geeri kama dambeys ah, sidaasi darteed waxa lagama maarmaan ah in xooga la saaro gaarida dacwo saafi ah jiilka soo koraaya si loo helo bulsho hagaagsan.

Gaarsiinta dacwada ee goobaha waxbarashada waxa ka jira gaabis badan. Manhajka waxbarasheed ma aha mid dabooli kara baahidaha da'yarta ay u qabaan diin barashada, walow maadooyin ka mid ahba ha ku saabsanaadeen qeybo aan badneen oo diinta laga soo qaatay, waxaase ka muuqdo in uusan ku saleesneen manhajka aasaasiyaadka laga rabo qofka muslimka ah inuu ka barto diintiisa, sidaasi darteed waxa haboon in loo deymo lahaado gaabiskaas jiro sidii loo dabooli lahaa. Waxa goobaha waxbarashada ka banaan fursado ay muhiim tahay in si degdeg ah looga faa'ideeysto si cid kale oo qalooc la damacsan bulshada aysan u buuxinin booska banaan. Hadaba si loo helo dacwo miro dhal ah oo ka hana qaada goobaha waxbarashada waxa haboon in arrimahan hoose

1. Waxaa aad muhiim u ah in goobaha waxbarashada sida macaahida iyo iskuulada lagu baahiyo dacwada islaamka oo aan la yasin dhalinyarada iyo caruurta soo koreysa, waa kuwa bedali kara mustaqbalka islaamka oo

wax weyne tari kara barrito bulshadooda. Marka loo fiirsado waxay leeyihiin iskuulada wax loo la yaqaan dhaabuut oo la soo xaadiro oo ardada safaf u istaagaan ka hor inta ay xiisooyinka bilaaban, halkaasi waxa ka banaan fursad ka faa'ideysi mudan, fursadda waxay tahay in isbuuci hal ama laba jeer iskuul kastaaba xilliga Dhaabuutka laga joogteeyo barnaamij diini ah oo marba mowduuc wadciga khuseeya looga hadlo, iyo in loo aqriyo kutub yar yar oo ahmiyad u leh dhalinyarada toosnaantooda iyo ku taagnaanshaha dariiqa xaqa.

2. Ardada jaamacadaha dhigata in badan oo ka mid ah waxay naftooda ka dhaadhiciyeen, ama aamineen iney gaareen martabo sare oo aqooneed, taasi oo u sii jiiday iney ku daydaan dadka ay aamin sanyihiin aqoontan iney kaga sareeyaan sida gaalada gaar ahaan reer galbeedka, iskuma howlaan barashada diinta, maalinta jimcaha iyo marar kale oo dhif ah ayay tagaan masaajida, dadka cilmiga diineed xambaarsan waxay u arkaan niman wacyiga aan la jaanqaadi karin oo waddo mugdiya ku socdo.

Maadaama dhalintaasi aysan laasimin masaajida oo xalaqaadka cilmigana ay iskala sarreyan waxay dareemayaan baahi diineed oo u baahan in la daboolo, haddii lagu sii daayo sida ay yihiin waxay gacanta u galayaan gaalad ka sokow firaq iyo kooxo baadiyaysan sida Shiicada iyo Takfiirka. Marka waxa lagama maarmaan ah in Dacwado loo gaarsiiyo hadba sida ugu sahlan oo ay ku aqbali karaan sida;

- In Siminaarro loogu qabto hoolalka jaamacadaha, iyo hoteelada, kaasi oo lagu baranaayo duruus kooban oo marba majaal iyo mawduuc gaar ah khuseeya.

- In loo qabto Muxaadaraad khuseeya xaaladooda iyo wadciga uu maanta caalamka maraya.

Habka iyo Qaababka Dacwada loo gaarsiin karo Dhalinyarada

Umadaha Muslimka ah kala duwan ee dunida ku dhaqan dhamaan waxay ka siman yihiin tirada ugu badan ee bulshooyinkooda waa dhalinyaro, gaar ahaan umaadda Soomaaliyeed waxa lagu tilmaamaa in 70/100 inay yihiin dhalinyaro taasi waxay ka dhigan tahay aqlabiyadda ugu badan bulshada waa da'yarta, taasi macnaha weyn ee dacwada u leedahay ayaa ah laba arrimood:

1. Sida taariikhda lagu haayo anbiyadii la soo diray inta ugu badan ee rumaysay waa dhalinyaro, asxaabtii Rasuulkeena (scw) u hiillisay ee hareer joogsaday xaqa waxay ahaayeen badan kooda labaatan jirro. gargaarayaasha dacwada mar kastaba siday taariikhda warineyso waa dhalinyaro sidaas darteed dadka dacwada wada waa inay il gaar ah u lahaadaan barbaarta si dawcada u baahdo.

2. Mar kastaba dhalinyarada waxay u dhaw yihiin dhinaca xaqa ku taagan inay la saftaan sababtoo ah waa xaqiiqo raadiyayaal, waana xaq doonayaal mana jirto inta badan caqabado xaqa ka horjoogsado marka laga reebo shahwada dhalinyaranimo, halka dadka waa weyn laga yaabee inay culeesiso amaba ay caqabado ku noqoto mansab ama maal uu haysto darteed uu dacwada garab joogsigeeda uga haro.

Sidaas awgeed waxa la gudboon ducaadda inay xooga saaraan dhalinyarada , si looga lib keeno halganka dacwadeed ee ku wajahan da'yarta waa in lagu dadaalo arrimahan hoose:

1. In xooga la saaro muhiimada ay leedahay soo bandhigida arrimaha la xiriira Caqiidada toosan iyo qaabka ay uga digtoonaan karaan dhalinyarada kooxaha qalooca iyo quraafaadka ku dhex baahiya bulshada sida Shiicada iyo Takfiirka oo ololo badan ka wada baryahan dunida siiba dalalka ay dagaalada halakeeyeen.

2. In lagu dhex baahiyo dhalinyarada kutubo iyo risaaloyinka oo af soomaali ku qoran oo bilaa lacaga ah, kuwaasi oo laga qoray qeybaha kala duwan ee diinta, si ay ugu fududaato xog iney ka haystaan diintooda.

3. In la sameeyo gudi u kuur gala xaaladaha dhalinyarada iyo baahiyahooda si ay u sahlanaato soo dumida iyo ina y noqdaan dad mutadayiniin ah oo ku toosan dariiqa saxda ah.

4. In la sameeyo maraakis laga fidiyo dacwada si loogu qabto , nadwooyinka, siminaarada , muxaadaraadka iyo in lagu baro xirfado kala duwan oo dhalinyarada ay ku xoogsan karaan.

5. In loo sameeyo dhalinyarada koorsooyin kooban oo diinta lagu baranaayo oo lagu bixiyo shahaado dibloomo ah.

6. In looga faa'ideeyo dhalinyarada waqtiyada firaaqada ay leeyihiin barnaamishyo wax tar u leh noloshooda aduun iyo aakhiro, sida gargaarka degdega, barashada kumbuyuutarka, dabaasha, farda fuulka, barashada farsamooyinka gacanta sida; harqaanka, faryaamada,

fuundiga, tubiste, korontiste, cunto karinta,cilaanka, sameynta dharka, iwm, ayada oo ay barbar socoto dacwada iyo barasha diinta.
Arrinkan aad ayuu muhiim ugu yahay da'yarta si loo buuxiyo firaaqadooda, uguna noqoto faa'ido waxbadan u tari doonto mustaqbalkooda, iyo in lala tartamo heya'adaha shisheeye ee qabta wax u dhaw barnaamishyadaasi ayaga oo ka damacsan dano guracan iyo dhaqan doorin bulsho.

7. In la soo saaro wargeys khuseeya dhalinyarada oo bil ama laba bilood le ah oo mawaadiic iyo arrimo ahmiyad xambaarsan lagu qoro, siiba in xooga la saaro wargeys gaar u ah gabdhaha.

8. In la sameeyo macaahid lagu barto Daacinimada oo dufcado arday ah ay ka soo qalin jabiyaan sanad kastaba si loo daboolo baahida ay u qabaan da'yarta inay ducaad xaqa fidiya noqdaan, inta ay noqon lahaayeen ducaad baadhilka iyo bidcada horbooda.

9. In xoogga lagu saaro Muxaadaraadka, khudbooyinka jimcaha, iyo qoraalada dacwadeed mawduucyada soo jiidashada u leh guud ahaan bulshada gaar ahaan dhalinyarada si toos ah u taabanaaya amaba sababi kara da'yarta qaloocan inay ku soo hanuunta, mowduucyadaasi qalbiga qofka gilgilaya waxaa laga xusi karaa:

- Taariikhda islaamka,
- Fitanta iyo calaamaadka saacadda qiyaamaha,.
- Qabriga iyo xaaladaha geerida kadib.

- Jannada iyo naarta.
- Iyo mowduucyada ka ag dhaw.

10. Marka dhalinyarada lala hadlaayo Sida xooga ay u saaraan ducaadda mowduuca Alwalaa walbaraa si la mid ah in xooga loo saaro walaaltinimada mu'miniinta ka dhaxeyso iyo xaqa muslimiinta ay isku leeyihiin, sida muuqatana mowduucaas gaabis badan ayaa ka jiro.

Habka iyo Qaababka Dacwada loo gaarsiin karo Dumarka

Caalamka aan dulsaaranahay waxa uu ka kooban yahay bulshooyin kala duwan xag kastaba, Bulsho kastana waxay ka kooban tahay qoysas, reer kastana waxa ugu muhiimsan waa hooyada sababtoo ah waa warshada soo saarta banii aadamka, sidaas oy tahay Soomaalidii hore muhiimad badan ma siin jirin wax barashada gabarta ilaa afka soomaaliga la heli karo oraahyo badan oo lagu liidayo dumarka inay cilmi baran karaan waxaana ka mid ah oraahda caan baxday ee dhaheysa (Naag Diin Maxay Ka Taqaanaa) taasi waxay keentay inay hooyada Soomaaliyeed ee laga rabay ubadkeeda inay barbaariso ayadaba aysan aqoonin wax cilmi ah mid diineed iyo mid maadi ahba.

Wixii ka dan beeyay bararugii Islaamka marka uu dalka soo galay wax badan ayaa iska badalay dumarka waxbarashadooda walow aan la dhihi karin waa sidii la rabay hasayeeshee baraarug badan ayaa jiro si loo sii xoojiyo dacwo gaarsiinta dumarka waxa lagama maarmaan ah in lagu dadaalo arrimahan hoose

1. In dacwada dumarka aan lagu koobin xijaabka iyo xaqa labada is qabta ka dhaxeeya kaliya balse in xooga la saaro in qeybaha dacwada guud la gaarsiiyo si gabarta Muslimada ah ay markeeda door muuqda uga qaadato faafinta diinta.

2. In loo sameeyo Maraakis u gaar ah dumarka oo maalin kastaba saacado kooban soo xaadiraan si loogu sahlo barashada iyo fahamka diinta islaamka.

3. In loo qeybiyo haweenka duruus duuban oo ku diyaarsan miimoriyo ama falaashyo si ay uga faa'ideystaan ayaga oo guryahooda joogo.

4. In loo hadiyeeyo dumarka ku kulansan xafladaha aroosyada kutubo yar yar oo af soomaali ku qoran iyo muxaadaraad iyo duruus kale oo aaladaha carsiga ee maanta la adeegsado ku duuban.

5. In lagu baraarujiyo in hooyada ay gabarteeda u hadiyeyso xijaab, kutub iyo salli taasi waxay raad ku yeelaneysaa nolosheeda danbe inay ahaato gabar toosan, haddii gabarta uu qalooc ku yimaada laga yaabee in ay arrimahaasi dib u xusuusato una noqdaan dhiirri galin dacwo.

6. In loo qabto tartano diini ah sida tartan Qur'aanka kariimka iyo kutubada yaryar la xiriira si sare loogu qaado aqoontooda diineed.

7. In loo tabobaro gabdhaha goobaha waxbarashada dhigta fidinta dacwada si goobaha u gaarka ah ee bilcaamanka ku kulmaan uga baahiyaan wanaaga una reebaan xumaanta.

Qaabka Dacwada Looga Fidin karo Guriga Dhexdiisa

Cid kasta oo muslim ah mas'uuliyad ayaa saaran oo laga rabaa inay si wanaagsan u gudato waajibka saaran, wuxuu Nabiga (scw) yiri:

كلكم راع وكلكم ، مسؤول عن رعيته

(Dhamaantiin waxaa tihiin qowsaar, dhamaantiinna waxaad masuul ka tihiin waxa leydiin raaciyay)

Haddaba waxa waalidka saaran masuuliyad aad u weyn, waxa looga fadhiyaa waajibaadka ka saaran ubadkiisa inuu u guto si wanaagsan, inbadan bulshada ka mid ah marka laga hadlayo xaqa ay ilmaha ku leeyihiin waalidka waxay is moodsiiyaan inuu yahay korriinshaha xaga jirka ah, oo waxay ku dadaalaan inay ka haqab tiraan baahiyaha guud hunguri, hu' iyo hooyga ah, taasi kaliya ma aha xaqa ilmaha ay ku leeyihiin waalidka, waxaase la mid ah taas xaga muhiimadda oo daruuri u ah barbaarinta ubadka tarbiyeyntooda iyo waxbaridooda iyo in lagu abaabiyo dariiqa toosan ee xaqa ah.

Sida waalidka uu ajar looga qoraayo camalada wanaagsan ee ubadkiisa ay sameeyaan ayaga oo laga naaqusinin ajarkooda, sidaas waxa la mid ah walidka aan caruurtiisa ku tarbiyeynin diinta islaamka oon ku hagin hanuunka xaqa ah, markay koraan danbi ay sameeyaan waxa uu waalidka halis ugu jiraa in wax looga qorayaa dambiyadaas maadaama uu dayacay yaraantoodii, oo wanaaga iyo wadada toosan uusan barin. Arrimahaan hoose waa qeyb ka mid ah dacwada guriga sida looga faafin karo:

1. In laga sameeyo guriga dhexdiisa dugsi waxbarasho oo xoogga lagu saaro xifdinta Qur'aanka kariimka.

2. Haddii ay mashquulsan yihiin waalidka In loo sameeyo macallin u gaar ah qoyska oo ubadka ka saacida barashada cilmiga diineed

3. In guriga laga joogteeyo akhrinta kutubada kala duwan ee lagama maarmaanka u ah diinta barashadeeda si qoyska aqoontooda diineed sare loogu qaado.

4. In la sameeyo Kulan asbuucle ah oo dhamaan reerka iskugu yimaadaan si ay iskaga wacyi galiyaan waxyaabaha ku soo kordha deegaanka ay ku noolyihiin ee aan ku wanaagsaneen diinta.

5. In caruurta waxyaabaha ay ku cayaarayaan fiiro gaar ah loo lahaado si looga digtoonaado duulllaanka maskaxeed meel kasta galay ee gaalada ay ku haayaan muslimiinta.

6. In shaashadaha tiifiiyada iyo aflaamta kala duwan ee ilmaha ay xiiseeyaan si weyn looga diktoonaado waxa jiro barnaamijyo maaweelada caruurta ah oo taleefishinada laga daawado kuwaasi oo qaarkood ay xambaarsan yihiin caqiido iyo caadaad gaalo, waxaana aad u adag in cid kasto ay fahanto qof fiiro dheer ah mooyee, si weyn ayaa loo maldahay oo loo ekeysiiyay maaweelo

caruureed kaliya laakiin waxay xambaarsan yihiin intaasi wayka gun dheeryihiin.

7. In guriga laga sameeyo maktabad kutubo iyo buugaag faa'ido badan u leh qoyska si xilliyada firaaqada ay u muraajaceeyaan.

8. In la sameeyo xilliyo gaar ah asbuuci hal mar lagu wado daawado ama lagu dhageysto barnaamishyada culumada iyo ducaadda ay diyaariyeen oo laga heli karo netka iyo meelaha istuudiyada ah, si ay u noqoto caado wanaagsan oo wanaaga la wada wadaago.

9. In lagu dhiirri galiyo ilmaha cibaadaadka kala duwan sida
    - Tukashada salaadaha shanta ah
    - Tagitaanka masaajida

10. In loo qabto caruurta tartamo aqooneeda ay ku tartamayaan xifdinta Qur'aanka kariimka iyo kutubada yar yar.

11. In loo sameeyo caruurta waqtiyo looga sheekeeyo Siiradii Suubanaha (scw) iyo qisooyinkii saxaabada iyo dadkii saalixiinta ahaa si ay ugu noqdaan ku dayasho wanaagsan oo dariiqa xaqa ah ugu sugnaadaan.

12. Muuqaalka iyo aflaamta waa sheyga ugu saameynta badan banii aadamka gaar ahaan caruurta sidaas darteed in loo sameeyo xilliyo ay daawadaan filimada laga matalay Taariikhda Islaamka sida:
Noloshii Rasuulka (scw) iyo saxaabadiisa.

- Goobihii Dagaal dhex maray muslimiinta iyo gaalada sida

- Dagaalkii Badar
- Dagaalkii Uxud
- Dagaalkii Khandaq
- Dagaalkii mu'ta
- Dagaalkii Furasha Makah
- Dagaalkii Yamaama
- Dagaalkii Yarmuuk
- Dagaalkii Qaadisiya
- Dagaalkii Xidhiin
- Dagaalkii Zalaaqa
- Dagaalkii Ceyn jaaluud

- Taariikhda hogaamiyayaashii Muslimiinta soo maray sida:

- Abuubaru Sidiiq
- Cumar bin Khadhaab
- Cuthmaan Bin Cafaan
- Cali bin Abii dhaalib
- Khaalid bin Waliid
- Qaqqaac bin Camar
- Macaawiya bin Abii sufyaan
- Cumar bin C/caziiz
- Dhaariq bin Zayaad
- Salaaxudiin Al ayuubi

- **Iyo filimada la mid ah ee laga matalay taariikhda culumadii muslimiinta sida**
- Imaam Maxamed bin Idriis AShaafici
- Imaam Abuu Xaniifah
- Imaam Maalik bin Anas
- Imaam Axmad bin Xanbal
- Imaam Bukhaari
- Imaam Muslim
- Imaam Abii Daawuud
- Imaam Nasaa'i
- Imaam Tarmid
- Imaam Ibnu Maajah

13. In lagu dhiirri galiyo lana baro ubadka xiriirinta qaraabada, waqtiyada firaaqadana la wado si ay u booqdaan ehelka iyo qaraabada.

14. In caruurta lagu xiro masaajida si xilliyada salaadaha u laasimaan una xaadiraan xalqooyinka cilmiga lagu barto ee ka socdo masaajida.

Habka iyo Qaabka Dacwada loo Gaarsiin karo Shaqsiga

Caadiyan qof kastaaba waxa uu leeyahay saaxibo iyo wadaay sokeeye oo uu ka dab qaato amaba kaga daydo in badan oo nolosha ka mid ah, waana xaqiiq qof kastaab rafiiqiisa inuu ka wax maqli og yahay marka loo fiiriyo guud ahaan dadka kale. Si guud ee bulshooyinka loola hadlo waxa ka saameyn badan mar kastaba in si gaar ah in shaqsiga loola hadlo, sababtoo ah qofka marka aad shaqsigiisa kala hadasho gaabiska diineed nafsaddiisa la xiriira wax aad u badan inuu wax kaa qaato haddii arrinkaasi uu sir labadiina idiin dhaxeyso tahay.

Siiradii Rasuulka ka muuqata maalmihii hore ee dacwada ay sirriyada aheed in si weyn u faafto waxa keenay waa dacwada shaqsiga ku saleesan, saxaabi kastaba markuu dacwada qaato halkaas kuma gaabsaneynin ee saaxibkiisa ugu dhaw ayuu gaarsiin jiray dacwada si uu wanaaga ula wadaago. Abuubar markuu Islaamayba maalmo gudahooda tiro tobaneeyo ah oo saaxibadii ku meersanaa u badan ayuu u soo dumay dhina diinta islaamka, sidaas oo kale ayuu saxaabi kastaba sameynaayay taasi oo ka dhigtay in guri kasta oo mako ku yaal uu galo iftiinkii diinta ilaa u gudubto qabiiladii kale ee carbeed.

Inkastoo mar kastaaba ay muhiim tahay dacwo gaarsiinta shaqsi kuma sii jirto maanta oo fasahaadka uu batay waxa loo qabaa baahi weyn in la helo ducaad u istaagto arrinkaasi, qaababka sahlan ee fududeyn kara in qofka uu dacwada ajiibo waxaa ka mid ah:

1. Qofka aad ula qasdayso dacwo gaarsiinta marka hore baro dabeecadihiisa sida wax yaabaha uu dabciyan ka helo ee uu jecel yahay si aad dacwada ugu sii marsiiso habka ugu sahlan ee uu ka helo.

Tusaale;

- Hadduu yahay qof wax yaabaha uu aadka uga helo iyo hiwaayaddiisa tahay akhris, waxa aad u sahlan in aad dacwada u sii marsiiso habkaas akhriska ah, adiga oo adeegsanaaya hadiyado ka kooban kutubo; buugaag iyo qoraalle kale oo isugu jiro kuwo daabacan iyo kuwa habka elaktaroonika ah u diyaarsan hadba sida suuro gal ah, qoraaladaas oo ku saabsan marba mowduuca dacwo ee rabto in shaqsigaas aad gaarsiiso.

- Hadduu yahay mid xiiseeya daawashada aflaamta waxaa aad u sahlan in dacwada aad ugu dusiso si muuqaal ah adiga oo u hadiyeynaya aaladaha ay ku duuban yihiin muuqaallo dacwadeed isugu jira muxaadaraad, barnaamishyo heer sare u diyaarsan iyo darsiyo koo kooban oo diini ah.

2. Ugu yeer qofka magaca uu ugu jecel yahay marka aad la hadleyso, taasi waxay raad badan ku yeelaneysaa qofka in qalbigiisa uu kuu soo jeediyo.

3. Mar kastaba u ducey qofka aad ula qasdeyso dacwo gaarsiinta, laga yaabee in uu Rabbi kaa aqbalo oo si fudud qofkaasi wanaaga u gaaro.

4. Si kasta oo qofka aad la hadleysid macaasida , munkarka iyo xumaanta ugu talax tago xusuusi wanaaga ay leedahay towbad keenka, ajarka laga helaayo sameynta camalada wanaagsan iyo barwaaqada badan ee beeraha jannaad loogu diyaariyay qofka ku toosnaada wadada xaqa ah, si ay dhiirri galin ugu noqoto.

5. Soo qaado qisooyin la xiriira mowduuca dacwo ee qofkaasi kala hadleyso, sababtoo ah qisooyinka waxay raad badan ku reebaan nafsadda aadanaha.

6. Sii hadiyooyin kala duwan waqtiyo kala duwan si uu dhankaaga ugu soo dhawaado, una sahlanaato inuu kaa qaato wanaaga aad la jeceshahay gaarsiintiisa.

7. U noqo garab iyo gacan walaal, ka caawi waxa uu kaaga baahdo, taasi ayaa kuu sahleysa in dacwada aad waddo u arko wanaag iyo horumarka nafsaddiisa.

8. Ha noqonin qof canaan badan ama ceebeeya qof kale, u ilaali sirihiisa, ha faafinin ceebihiisa, cid kastaba way khaldami kartaa laakiin ma aha in la fadeexeeyo qofka ee dacwo fidinta waa wanaag farid iyo wax sheeg si hoose ah

Habka iyo Qaababka Dacwada looga Fidin karo Internetka

Sida maanta caalamka ka muuqata horumarka ticnaloojiyada waxa uu keenay inay is badasho hab nololeedki aadanaha, aaladda internetka ee aadka loo isticmaalo waxa ka buuxo bogag iyo baro bulshada ku kulmaan oo lagu soo gudbiyo afkaaro iyo qoraalo taariikheed , waxaana badi xambaarsan yihiin caqiido qaloocan iyo quraafaad aan jirin. waxaad moodaa inuu gaabis badan ka jiro xaga dacwada internetka maadaama ay ducaada ku yar yihiin isticmaalka iyo adeegsigeesa aaladan. taasi oo sababtay inay dhalinyarada u badan baraha bulshada dhexdooda ay shaac ka noqotay bidco iyo munkaraad badan oo radin u baahan. Sidaas darteed waxa lagama maarmaan ah in la adeegsado wadooyin iyo qaabab casri ah si Dacwada ay u gaarto dad badan oo hadda ka dhega xiran maqalkeeda, ama ay gaabis ku tahay gaaritaan keeda, sababo la xiriira teedka qarsoon oo kala dhex yaal Daaciga gudbinaayay Dacwada iyo dadkii la gaarsiinayay oo ah ayada oon laga faa'ideysan adeegsiga iyo in loo isticmaalo aaladda internetka xaga wanaaga iyo fidintiisaba. Arrimahan hoose waxay sahlayaan in laga dhigo netka xalqo cilmiyeed ama xarun dacwada laga fidiyo:

1. In la sameeyo bogog cilmeyeed la soo geliyo duruusta iyo muxaadaraadka kala duwan ee culumada duubtay iyo khudbadaha jimcaha si cid kasta oo xaq doon ah uga faa'ideysato.

2. In la sameeyo oo aad loo badiyo canaawin la xiriira baraha bulshada sida Facebook, Twitter, Whatsup, iyo wixii la mid ah si loo soo dhigo

muuqaalo gaagaaban iyo qoraalo kooban oo xambaarsan mug iyo macno diineed oo weyn si dhalin yarada ula socdaan wacyiga jira iyo waxa kala gudboon.

3. Qof kasta oo Muslim ah oo isticmaalaya baraha bulshada waxaa la gudboon inuu door ka qaato gudbinta dacwada iyo fidinta wanaaga, ha noqonin sida weelka qof waxii lagu shubo qaata kaliya ee mar kaaga gudbi wanaaga haba ahaato inaad u tilmaanto qof kale bogoga diiniga ah.

4. In lagu qoro bogoga iyo baraha bulshada maqaallo bil ama isbuuclo ah oo si taxane ah loogu soo gudbiyo dadweynaha mowduucyo muhiim ah oo nolosha guud ahaan khuseeya.

5.In looga digo bulshada Muslimka ah bogoga iyo baraha faafiya bidcada iyo fasahaadka oo ay muumulaan kooxaha iyo firqooyinka baadiyeysan ee diinta islaamka u nasab sheegta siiba kuwooda luqadda Soomaaliga ku qoran oo laga yaabo in lagu baadiyoobo ayadaan leyska jiraynin.

6. In la sameeyo gudi dacwadeed taqasus u leh xaga internetka, gudigaasi oo shaqadiisa tahay:

- La dagaalanka baraha faafiya quraafaadka iyo caqiidooyinka qaloocan.

- Isku dayga in la xiro ama la carqaladeeyo cinwaanada faafiya bidcada, munkarka, macsiyada iyo fasahaadka.

- In la daba galo wax yabaha bidcada ah iyo fasahaadka badan ee baraha bulshada ku baahsan si looga digo umadda.

7. In la sameeyo bogag iyo baro bulshadeedka internetka oo culumada aqoonta leh ay gacanta ku haayaan, goobahaas oo u khaas ah dhalinyarada iyo dumarka si looga tawjiihiyo amaba looga jawaabo su'aalaha ay ku taagan ee ay jawaabaha u raadinayaan.

Habka iyo Qaababka Dacwada looga Fidin karo dalalka gaalada

Si ahaan marka loo fiiriyo fursado mihiim ah ayay haystaan dadka ku nool dhulalka gaalada sababtoo ah waa nasiib aan la heli karin qof muslim ah oo u suuro gashay inuu qof gaal dawcada xaqa ah gaarsiiyo, waana guul aan wax loo dhiga jirin haduu xaqa u soo dumo kuna guuleysto inuu soo Muslimiyo hal qof kaliya wax kastana way ka qaalisantahay. Qof kastoo muslim ah oo dibadahaas ku nool waa fursad u banaan oo uu ajar badan ku kasban karo waana shaqo aad muhiim u ah ka miro dhalinteeda, Si taasi looga faa'idaysto qodobadaan hoose waxay sahli karaan si howshaasi dacwo looga lib keeno.

1. In la daabaco ku tubo yaryar oo ku turjiman luqadaha looga hadlo dalkaas, kutubtaas oo u diyaarsan hab dacwo loo gaarsiin karo qof u hor leedahay diinta islaamka.

2. In jidadka muhiimka ah iyo isgoysyada magaalooyinka laga qeybiyo kutubo yaryar oo diini ah kuna turjuman hadba luqadda ay ku hadlaan dadka dawcada la gaarsiinayo.

3. In la sameeyo boorar lagu xardhay halku dhigyo dacwo macno weyn oo soo jiidasho leh xambaarsan, lana dhigo goobaha ay dadka ku kulmaan sida boosteejooyinka, beeraha loo nasasho tago, barxadaha cayaaraha loogu talagalay, isgoysyada iyo jidadka saxmadda badan, goobaha waxbarashada hortooda, iyo suuqyada camiran jidadka gala.

4. Si xaqa u daahiro dacwadana loo guto in fagaarayaasha iyo warbaahinta lagala galo doodo cilmiyeysan madaxya weynta horbooda diimaha qarriban ee quraafaadka ku dhisan.

5. In la caawiyo oo kaalmo nooc kasta leh loo fidiyo dadka dhibaataysan ee diimaha kale haysta si hiilka iyo garabkaasi loogu fidiyay sabab ugu noqdo si xaqa loogu soo dumo.

Habka iyo Qaabab kale oo si guud ahaan ah Dacwada loo fidin karo

1. In la sameeyo hay'adda farista wanaaga iyo reebidda xumaanta, waxayna howsheeda noqoneysaa hadba deegaanka ay joogta waxa ka suuro gal ah ee dacwa faafinta ah inay u istaagto iyo baahiyaha ay qabaan bulshadaasi in ay daboosho oo ku saabsan xagga diinta. Waxaana mar kastaba lagama maarmaan ah in loo fiirsado isbadallada dunida ka jira ee ku saansan xagga tiknaloojiyada iyo aaladaha casriga ah, si faafinta dacwada ay u sahlanaato. Tusaale

- Barigii hore waxa la adeegsan jiray Rikoor iyo Cajalado, hasayeeshee maanta casri kale ayaa loo talaabay waxa la isticmaalaa Labtobyo, Mobel, Falash iyo Miimoriyo.

2. In la daabaco buugaag yar yar oo af soomaali ku qoran si heer sare oo soo jiidasho lehna loo diyaariyay, buug kastaba uu khuseeyo kaliya hal ama laba mawduuc oo muhiim ah.

3. Waxaa jira dad badan oo aan ka faa’ideysan karin Maqalka oo kaliya balse u baahan wax muuqda oo ay arkaan si naftooda ay ugu qanacdo ugu yaraan, inkastoo Telefishinada af soomaaliga ku hadla barnaamijta laga soo daayo ay muujinayaan, inaan ahmiyad la siinin diinta, walow ay soo daayaan muxaadaraad marar kooban, dhab ahaantii taasi ma ahan mid dabooli karta baahida diineed ee bulshada ay dareemeyso , waxa ila haboon in la helo Tiifii si joogta ah hawada ugu jira oo u go'an kaliya fidinta dacwada iyo diin barashada, si ay u helaan meel ay ka nuur qaataan Soomaalida ku baahsan daafaha dunida.

4. In baabuurta rakaabka ee isga gooshta gudaha magaalooyinka ama gobalada guud ahaan in darawalada loo qabto siminaarro kooban laguna wacyi galiyo dhowr arrimood oo aad ay ugu liitaan xag diineed marka loo fiiriyo

- In laga wacdiyo gaadiidleyda jaadka iyo sigaarka salfaday noloshooda, haddii aysan suuro gal aheen inay joojiyaan isticmaalka xitaa si un loo yareeyo shartooda in lagu wacyi galiyo inaysan ku dhex isticmaalin gaadiidka dhexdiisa oo rakaabkuna saaran yahay.

- Miimoriyada ay heesaha ka buuxsadeen ee inta ay sare u qaadaan codka muusikada gaarigaba lala saarnaan waayo dhawaqeeda in laga wacdiyo ugu yaraan si ay uga dhaafaan danbiga ay bulshada ku dhex sameynayaan.

- In lagu wacyi galiyo naxariista iyo isu dhimrinta ka dhexeysa muslimiinta gaar ahaan dadka da'da ah si ay ugu fiiriyaan il naxariiseed bulshada ay u adeegayaan guud ahaan iyo gaar ahaan waayeelka jilicsan ee garab qabashada u baahan xilliyada ay korayaan gaadiidka.

5. In laga shaqeeyo heshiis iyo hagaag oo la dhex dhigo bulshada is fahmi waaga soo kala dhex galo.

6. In la abuuro mu'asasaad dacwo, cilmi iyo gargaar ka shaqeeya si loo daboolo baahiyaha badan ee bulshada ay la daala dhacayaan ee isugu jiro jahliga iyo faqriga ku baahay balad iyo baadiyaba.

7. In la sameeyo ololo dacwadeed oo dadka lagu barayo aasaasiyaadka diinta muddo bilooyin ahna socdo, olalahaasi oo la mid ah kan ay Soomaalida wada taqaan ee xukuumaddii kacaanka ay sameysay ee la dhihi jiray olalihii hirgalinta farta soomaaliga, dadweynaha u yaqaanaan olalihii alif ba' ta'da. Olalahaan diin barashada ah waxa muhiim ah in lagu soo beego xilliyada fasaxa iskuulada si ardada iskuulada ay uga qeyb qaataan olalaha, lagana sameeyo balad iyo baadiye sanad kastaba bilaha ay fasaxa ka yihiin goobaha waxbarashada.

8. In la sameeyo gaadiid codbaahiyayaal ay saaran yihiin oo loo adeegsado meelaha bulshada isugu timaado caadiyan sida suuqyada, jidadka iyo isgoysyada camiran, iyo meelaha loo damaashaad tago ee bulshada u siman tahay sida xeebaha Liido iyo Jaziiro, si loo xusuusiyo bulshada xilliyada salaadaha, loogana digo dabinada iyo wadooyinka sheydaan.

9. In la sameeyo mashaariic khayri ah oo maalgalintooda ka imaaneyso bulshada intooda hantida leh ee tujaarta ah iyadoo cid kasta oo kheyr doon ah oo wax ku darsaneysana ay u furan tahay, si loo daboolo duruufaha nololeed baaxadda leh ee bulshadeena intooda tabarta liidata ay la kufaa kacayaan sida

- In la kafaalo qaado caruurta agoonta ah oo loo sameeyo xarumo lagu xanaaneeyo oo leh asaasiyaadka nolosha sida hooy, hu, hunguri, waxbarasho -iyo caafimaad.

- Waxa agoonta la mid ah caruurta darbi jiifka ah laga yaabee qaarkood in waalidiintood ay nool yihiin hasayeeshee waa kuwaas dayacan oon daryeel nololeed haysan in ayagana loo sameeyo xarumo dhaqan celin ah, oo kala mid ah xarumaha agoonta xaga asaasiyaadka nolosha.

10. In la sameeyo xarumo dhaqan celin ah oo loo diyaayiyay dhalinyarada ay daroogada halakeesay ee dalka ku sugan iyo kuwooda dibadda laga soo celiyo si aysan bulshada inta loogu sii dhex daayo aysan u duufsan da'yarta kale ee wanaagsan.

11. In la sameeyo ololo balaaran oo dal iyo dibad ah oo looga soo horjeedo daroogada iyo maandooriyayaasha noocyadooda kala duwan oo uu u horreeyo geedka loo yaqaan jaadka kaasi oo burburiyay dhaqan dhaqaalihii bulshada Soomaaliyeed meel kasta oo dunida kaga dhaqan yihiin haba ugu sii badnaadeen kuwa geeska bari ee Afrika ku dhaqan.

12. In la sameeyo wacyi galin guud oo lagu wajaho kiimikada dumarka ku diiraan maqaarkooda ayaga oo isku cadeynaaya taasi oo xanuunno iyo waxyeello badan u soo jiiday dadka marsada.

13. In laga sameeyo masaajida waa weyn xalaqaad cilmi barasho ah oo waqtiyeysan sida macaahidda iyo jaamacadaha kala mid ah jadwalka iyo waqtiga cayiman, xalaqaadkaas oo duruus xiriiir ah laga heli karo oo laga bilaabo kutubta asaasiyaadka ah ilaa kuwooda waa weyn faniyada kala gadisan ee cilmiga diineed iyo luqada carabigaba isugu jiro.

14.In shirkadaha isgaarsiinta ah barnaamijyadooda mobeylka la xiriira looga faa'ideysto qaab dacwo sida in la abuuro adeeg ku saabsan xusuusinta waqtiyada salaadaha oo wacdi qaabeysan iyo wacyi galinno kale la socdaan.

Gunaanad

Aaladaha iyo ticnaloojiyada casriga ah waxay keensatay khatar aan la dhayalsan karin waxa ka dhex socda dacwooyin sheydaan oo lagu baadiyeynaayo da'yarta iyo dumarka muslimiinta. Hadii aan dacwo xaq ah lagala hor tagin waxa gacanta ka baxaya jiilka soo koraaya , arrinkaasi wax ka mid ah way muuqataa, magaalooyinkii waa weynaa ee dalka dhalin yarta ku dhaqan waxay labis, muuqaal iyo maanba la wadaagaan darbi jiifka reer galbeedka oo ay intaasiba kaga daydaan. taasina waxa sababay baraarug la'aan jirta iyo barbaarta soo koreysa oo la gacan bidixeeyay, waalidka wuxuu ku mashquulay kaliya inuu ka haqab tiro ilmihiisa sadaxda nolosha lagama maarmaanka u ah (Hunguri , Hu' iyo Hooy) wuxuuse hilmaamay inuu ku hago hanuunka diinta iyo dhaqanka hagaagsan.

Walow Culumada iyo ducaadda ay hore u soo dadaaleen iyagana muddooyinkii danbe gaabis badan ayaa ka muuqday, culeesaad nololeed iyo cabsi jirta ayaa caajis galiyay dhaqdhaqaaqii dacwo faafinta taasi oo maanta meel aad u hooseysa taagan.

Haddii aan wax laga badalin sida ay maanta wax u socdaan ee dardar hor leh iyo dadaal badan la muujinin umaddii Soomaaliyeed way ku daysay oo daadka ayaa qaadaaya oo ay diin laawayaasha wadaan.

Maxaa Maanta Nala Gudboon

Fidinta dacwada kuma koobna kaliya shaqsiyaad gaar ah, dhamaan waxaan nahay ducaad, wuxuuna yiri Suubanaha صلي الله عليه السلم

بلغوا عني ولوا اية

(Iga gaarsiiya Aayadba ha ahaatee)

wuxuu kaloo yiri:

كلكم راع وكلكم مسؤول عن رعيته

(Dhamaantiin waxaa tihiin qowsaar, dhamaantiinna waxaad masuul ka tihiin waxa leydiin raaciyay)

Fidinta dacwada dar Allaah kuma koobna goor iyo goob kaliya, mana aha mid waqti iyo waayo gaar ah ku eg, hasayeeshee waa mid mar kasta iyo meel walba suuro gal ah in lagu faafiyo hadba sida ugu sahlan ee umadda ay ku gaari kartana loogu howl galo.

Akhristow waxaad qireysaa oo xog ogaal u tahay in duullaan dhinacyo badan uu nagu socdo, gaalo iyo xulafadeeda sheydaan waxay isu habar wacdeen sidii loo waxyeelleyn lahaa diinta Islaamka iyo Dadkeeda Muslimiinta ah, hadana waad seexatay sidii qof aan isaga loo soconin, waxaad ogtahay Nabi danba oo soo baxaaya inuusan jirin, ma waxaad sugeysaa malaa'ig samada laga soo diro , taasi Allaah waa awoodaa laakin ma dhaceysee yaad sugaysaa?

Xaqiiqda waad ogtahay xaalkana waad aragtaa xil ayaa kaa saaran xaqa fidintiisa, maalinta qiyaame marka lagu soo hor joojiyo Rabbi oo uu ku waydiiyo maxaad u soo qabatay diinteyda, dadkaas walaalahaa ahaa ama aqribada kuu dhaw ahaa maxaad ugu fiirsatay xumaanta oo xaqa ugu sheegi waysay? hadaba sii diyaarso weydiimahaas jawaabahooda.

Akhristow wadada badbaada aduun iyo aakhiro waa ku dhaqanka diinta iyo faafinta dacwada, u kac fidinteeda oo xaqa faafi waxaad helaysaa ajar fara badan , fitantana waad ka badbaadeysaa.

Ilaahey ayay mahad u sugnaatay ii suura galiyay inuu soo gabagaboobo buugan yar maalin Sabti ah 8 Safar 1439

Nararriis iyo Nabad gelyo nabigeena korkiisa ha ahaato isaga, ehelkiisa, asxaabtiisa, iyo intii wanaaga ku raacday tan iyo maalinta danbe.

Tixraac

1كلنا دعاة أكثر من 1000 فكرة ووسيلة وأسلوب في الدعوة إلى الله .

تجارب العلماء والدعاة قديما وحديثا

عبد الله بن أحمد العلاف

2وسائل الدعوة إلى الله تعالى في شبكة المعلومات الدولية (انترنت.

وكيفية استخداماتها الدعوية

الدكتور إبراهيم بن عبد الحيم عابد

الأستاذ المساعد بقسم الدراسات الإسلامية

كلية المعلمين جامعة الطائف

3 .Muxaadaraadka

Shiikh Mustafe Xaaji Ismaaciil Haaruun

Shiikh Mamaxamad Idriis

Shiikh Maxamad Cabdi Umal

NOQO SHAQAALO DIINEED

SHUQUL LAGA QABTO ARLADA GUUD KEEDA WAXA U SHARAF BADAN INAAD NOQOTO SHAQAALO DIINEED

Luqmaan Xamraawi

8 Safar 1439